# Golaha Wakiilladda JSL



# WARBIXINTA
## Wax-qabadka Sannadkii 2024 ee Aqalka Golaha Wakiillada 5aad ee Somaliland

SOMALILAND HOUSE OF REPRESENTATIVES © 2024

HARGEISA-SOMALILAND\
Somalilandparliament.net

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**GOLAHA WAKIILADDA**

*********************************************

# WARBIXINTA WAXQABADKA SANNADKII 2024 GOLAHA WAKIILLADA 5AAD EE SOMALILAND

**APRIL 2025**

# TUSMADA_Toc198385690


HORDHAC ........ 1

WAX-QABADKII KAL-FADHIYADA GOLAHA ........ 2

Warbixinadii Golewaynaha laga hor Jeediyay Sannadkii 2024kii ........ 2

Mashaariicda Sharci (Xeerarka) ........ 4

Masuuliyiintii Qaran Goluhu Ansixiyay ........ 5

Masuuliyiinta Qaran ee Goluhu Su'aalaha waydiiyay ........ 5

Mooshinadii Golaha la horkeenay ........ 6

Ansixinta Odoroska Miisaaniyadaha Qaranka ........ 6

Arrimaha kale ee Goluhu ka doodday ........ 7

Go'aanadii Goluhu gaadhay Sanadkii 2024kii ........ 8

WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA 2024KII ........ 11

GEERIDII MADAXWEYNIHI HORE MD. AXMED SIILAANYO. ........ 22

TABOBARADA & AQOON KORODHSIYADII ........ 22

XADHIGII XILDHIBAAN MAXAMED ABIIB YUUSUF ........ 24

DOORASHOOYINKII NOVEMBER 2024 DALKA KA DHACAY ........ 26

SAFARADII DALKA DIBADDIISA LOOGU BAXAY ........ 29

LIISKA TIXRAACYADA. ........ 33

B) Ajandayaasha Kal-fadhiyadii Golaha ........ 33

T. Liiska Mudanayaasha Golaha Wakiillada ........ 37

J. LIISKA QAAR KA MID AH SHAQAALAHA GOLAHA WAKIILADA ........ 40

# *HORDHAC.*

Xeer-dejinta dalku waxay ka mid tahay Saddexda tiir ee Qaranku ku qotomo, sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas oo kala ah Xukuumada (Excutive), Garsoorka (Judiciary) iyo Xeer-dejinta (Legislation).

Golaha wakiilladu waa mid ka mida ah labada aqal ee Baarlamaanka Somaliland ka kooban yahay, kuwaas oo kala ah (Guurtida iyo Golaha Wakiillada) oo marka la isku darro loogu yeedho Xeer-dejin ama Baarlamaan. Golahan Wakiillada ee la soo doortay 31 May 2021 waa Golihii labaad ee ku yimaada qaab doorasho toos ah, waana Golihii 5aad (afraad) oo ay ka horeeyeen afar gole, saddexda gole ee kale waxay ku yimaadeen hab-beeleed (xulasho). Afartaas Gole ee Golahan ka horeeyay waxay kala ahaayeen: -

- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay shirweynihii Burco **1991 - 1993** kana koobnaa **(111)** xubnood.
- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Boorama **1993-1997** kana koobnaa **(75)** xubnood.
- Golihii wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Hargeysa **1997-2005** kana koobnaa **(82)** xubnood.
- Golihii wakiilada ugu horeeyay shacabku si toos ah u soo doorto September 2005kii, **2005-2021** kana koobnaa **(82)** xubnood.

Golaha Wakiillada waajibaadkooda, tilmaamtooda Guud iyo Awoodoodu waa Xubno ka wakiil ah dadweynaha, waana qeybta 1aad ee Xeer-dejinta iyo ogolaanshaha iyo Illaalinta Siyaasada Guud ee dalka lagu hagayo iyo sidoo kale ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soo saarid ama wax-ka beddelid qaanuun iyo sidoo kale Ansixinta Wixii Maaliyad khuseeya oo ka mid yihiin ansixinta Miisaaniyada, Ogolaanshaha Cashuuraha, Assaasida Keydka Dhakhliga Somaliland, Daabacada Lacagta iyo habeynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageed, Sida ku cad Qodobka 39aad, Qodobka 53aad, Qodobka 54aad iyo Qodobka 55aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Qaab-dhismeed-ka guud ee uu Golaha Wakiiladu leeyahay waxa u dheer inuu leeyahay Guddiyo u kala xilsaaran hawlo iyo shaqooyin kala duwan, waxanay ka kooban yihiin 10 Guddi Sida ku cad Xeer-hoosaadka Golaha Xeer Lr. 01/2021. Goluhu Sannadkii 2024kii wuxuu yeeshay **saddex kal-fadhi** oo ahaa kal-fadhigii 7aad, 8aad, 9aad iyo qayb ka mid ah kal-fadhigii 10aad, wuxuu kal-fadhiyadaas qabtay hawlo aad u muhiima sida Ansixinta Mashaariic Sharci, Ansixinta Masuuliyiin Qaran, Ansixinta Miisaaniyadaha qaran iyo hawlo kale oo aad u muhiima, Hadaba warbixintani waxaynu ku soo koobaynaa Wax-qabadkii Golaha ee Sannadkii 2024kii.

## WAX-QABADKII KAL-FADHIYADA GOLAHA

***Kal-fadhigii 7aa, 8aad, 9aad iyo 10aad ee Golaha 5aad ee Wakiillada Somaliland***

| | | |
|---|---|---|
| **1.** | Kal-fadhigii 7aad | 03 Fadhi 2024kii |
| 2. | Kal-fadhigii 8aad | 14 Fadhi |
| 3. | Kal-fadhiga 9aad | 16 Fadhi |
| 4. | Kal-fadhiga 10aad | 06 Fadhi 2024kii |
| 5. | Kulamadii Gudiyada Golaha Wakiiladu yeesheeyn | 131 Kulan |
| 6. | **Isugaynta Fadhiyada iyo Kulamadii Gudiyada** | **170 Fadhi/kulan** |

## Warbixinadii Golewaynaha laga hor Jeediyay Sannadkii 2024kii

Waxa Sannadkii 2024ka Golaha laga horjeediyay 16 Warbixinood oo isugu jiray Warbiixnada Gudiyada, Warbixinada Xeerarka, Mooshino, Miisaaniyado, Xisaab Xidho iyo kuwa Masuuliyiin Qaran ay Golaha ka jeediyeen. Shaxdan hoose waxay muujinaysaa Nooca Warbixinta Golaha laga jeediyay, taariikhda la jeediyay iyo cidda jeedisay.

| Taariikhda | Nooca Warbixinta | Cidii akhridey |
|---|---|---|
| **07 January 2024** | Soo Jeedin Mooshin ku saabsan Xil-gudashada Mudanayaasha Golaha Wakiillada oo Mudanayaal soo jeediyeen, | Md, Mustafe Axmad C/laahi (Khayreeye) |
| **07 January 2024** | Soo Jeedin Mooshin ku saabsan in Golaha Wakiilladu Qaraar Gole kaga jawaabo go'aan ka soo baxay Baarlamaanka Somaliya 01 January oo durayay madax-banaanida Somaliland, heshiiska is-afgarad ee dhexmaray Dawlada Somaliland iyo Itoobiya. | Md, Maxamed Xasan Siciid |
| **08 January 2024** | Jeediinta Go'aanadii laga soo saaray Mooshinadii Fadhigii hore ee Mudanayaasha oo Qodobada Go'aankaas Golaha la horjeediyay | Mr, C/risaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guud ee Golaha |
| **08 January 2024** | Warbixinta Xeerka Dakhliga Shidaalke ee Gudidda Deegaanka, Kh. Dabiicga iyo Wax soo saarka. | Md, Mubaarik Muuse Ismaaciil Gudoomiyaha Gudidda. |
| **13 January 2024** | Warbixinta Wasaarada Maaliyada ee Odoroska Miisaaniyada ee Sannadka 2024ka. | Md, Dr. Sacad Cali Shire Wasiirka W. H. Maaliyada |
| **03 March 2024** | Warbixinta Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ee Odoroska Miisaaniyada ee Sannadka 2024ka | Md, C/rashiid C/aahi Muuse Gudoomiyaha Gudidda. |
| **03 March 2024** | Warbixinta Gudidda Gaarka ah ee loo xilsaaray u kuurgalida iyo soo qiimaynta | Md, Axmad Cabdi Ibraahim Xubin Gudidda gaarka ah. |

| | | |
|---|---|---|
| | arrintii la xidhiidhay Tacriifada ee u dhaxaysay Shirkada Waddaniga ah ee NFMC iyo Shirkada DP World | |
| **26 May 2024** | Warbixinta Xeerka Hawl-gabka iyo xaqsiinta Shaqaalahada Dawlada ee Gudidda Arrimaha Bulshada | Md, Axmad Jaamac Khaliif Gudoomiyaha Gudidda. |
| **02 July 2024** | Warbixinta Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawlada ee Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada oo Goluhuna su'aalo ka waydiiyay. | Md. Khaalid Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawlada |
| **24 August 2024** | Warbixinta Shir-gudoonka ee Wax-qabadka Kal-fadhigii 8aad ee Golaha 5aad ee Wakiillada Somaliland | Mr, C/risaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guude e Golaha |
| **25 August 2024** | Warbixinta Gudidda Joogtada iyo Anshaxa ee Kal-fadhigii 8aad | Mr, C/Kariim Aadam Cumar Gudoomiyaha Gudidda |
| **30 November 2024** | Warbixint Wasiirka Wasaarada Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda ee Xeerka Amniga Tiknoolajiyada iyo Dembiyadda Tiknoolajiyadda Casriga ah (Cybersecurity & Cybercrime Act) | Dr Axmed Yuusuf Idis Wasiirka W. Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda |
| **1 December 2024** | Warbixint Gudidda Hawlaha Guud, Guryaynta iyo Tiknoolojiyada ee Xeerka Amniga Tiknoolajiyada iyo Dembiyadda Tiknoolajiyadda Casriga ah (Cybersecurity & Cybercrime Act) | Md. Axmed Cabdi Ibraahim Gudoomiyaha Gudidda |
| **09 December 2024** | Waxa Golaha Warbixin iyo Tallooyin ku saabsan Qabyo-qoraalka Xeerka Amniga Tiknoolajiyada iyo Dembiyadda Tiknoolajiyadda Casriga ah (Cybersecurity & Cybercrime Act) siiyay khabiis Maxamed Xasan Cawaale | Md, Maxamed Xasan Cawaale Khabiir Xogaha iyo arrimaha Tiknoolojiyada ah. |
| **09 December 2024** | Warbixint Wasiirka Wasaarada Wasiirka W. Warfaafinta ee Xeerka Saxaafada Somaliladn. | Md. Cali Xasan Maxamed Wasiirka W. Warfaafinta |
| **28 December 2024** | Waxa Golaha Warbixin iyo Tallooyin ku saabsan Qabyo-qoraalka Xeerka Illaalinta Xogta Elektarooniga ah (Data Protection Bill) siiyay khabiis Maxamed Xasan Cawaale | Md, Maxamed Xasan Cawaale Khabiir Xogaha iyo arrimaha Tiknoolojiyada ah. |

## Mashaariicda Sharci (Xeerarka)

Sannadkii 2024kii Goluhu Wuxuu ka shaqeeyay Xeerar badan, kuwaas oo intoodba badan Goluhu Ansixiyay, iyadoo qaarkood Dhaqangaleen, qaarna marayaan akhriskii 3aad oo Golaha Guurtida ay u gudbeen. Hadaba shaxan hoose ayaa lagu muujiyay Xeerarkaas Goluhu Ansixiyay iyo marxalada ay marayaan.

### B. Xeerarka Goluhu Ansixiyay ee Guurtida u gudbay

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada Qaranka | 13/02/2024 | Golaha Guurtida |
| 2. | Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Sh. Dawlada | 03/08/2024 | Golaha Guurtida |

### T. Xeerarka Madaxweynaha u gudbay

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Wax ka badelka iyo kaabista Xeerka Doorashooyinka Guud iyo D. Codbixiyayaasha | 09/03/2024 | Madaxweynaha |
| 2. | Wax ka badelka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada | 09/03/2024 | Madaxweynaha |
| 3. | Xeerka Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta | 07/05/2024 | Madaxweynaha |
| 4. | Xeerka Ciidanka Qaranka | 30/06/2024 | Madaxweynaha |
| 5. | Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada | 16/09/2024 | Madaxweynaha |
| 6. | Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada. | 21/12/2024 | Madaxweynaha |
| 7. | Xeerka Garyaqaanka Guud ee Xukuumadda | 22/12/2024 | Madaxweynaha |

### J. Mashaariicda ee Gudiyaddu gacanta ku hayaan

| N | Mashruuc Sharciga Dakhliga Shidaalka | Gudiddda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah |
|---|---|---|
| 1. | Mashruuc Sharciga Aasaaska Wakaalada Madbacada Qaranka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 2. | Mashruuc Sharciga Jidaynta kabka H. Gobolada Barri iyo Nidaaminta Cashuuraha Dawladda dhexe u qabato dawldaha hoose | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 3. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Duulista Hawada | Gudidda Hawlaha Guud |
| 4. | Mashruuc Sharciga Aasaaska Kaydka Haamaha Shidaalka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 5. | Xeerka Amniga Technology-yada iyo Dambiyada Technology-yada Casriga ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 6. | Xeerka Illaalinta Xogta Electronics-ka ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 7. | Wax ka badelka Xeerka Xanaanada Xoolaha | Gudidda Deegaanka |
| 8. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Wada-marita Gaadiidka | Gudidda Hawlaha Guud |
| 9. | Mashruuc Sharciga Dakhliga Shidaalka | Gudiddda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah |

### X. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Wax ka badelka Xeerka Maamulka Maaliyada | Golewaynaha |

### Kh. Xeerarka Madaxweynuhu soo celiyay

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Wax ka badelka Xeerka Dakhliga iyo Cashuuraha Guud | Madaxwaynuhu soo celiyay |

## Masuuliyiintii Qaran Goluhu Ansixiyay

Intii lagu jiray Sannadkii 2024kii Kal-fadhiyadii Goluhu yeeshay wuxuu ku ansixiyay Masuuliyiin Qaran oo Xilal kala duwan oo loo magacaabay ogolaansho Goluhu u siiyay, waxayna Masuuliyiinta Goluhu Ansixiyay sannadkaas tiradoodu ahayd **15Masuul** oo isugu jiray Wasiiro, Wasiiro ku-xigeen, Gudoomiyayaal Hay'addo, Komishanka Doorashooyinka iyo Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axsaabta Siyaasada.

| N | Magaca Masuulka | Xilka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Siciid Maxamed X. Cismaan | Xubin Komishanka Doorashooyinka Qaranka ah | 06 May 2024 |
| 2. | Md. Siciid Maxamed X. Cismaan | Xubin Komishanka Doorashooyinka ah | 12/05/2024 |
| 3. | Md. Raabi Cabdi Maxamed | Wasiirka Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka | 12/05/2024 |
| 4. | Md. Axmed Maxamed Habane | Wasiirka Wasaarada Horumarinta Beeraha | 12/05/2024 |
| 5. | Md. C/naasir M. Xasan (Buuni) | Wasiirka X. Golayaasha iyo Arrimaha Dastuurka | 12/05/2024 |
| 6. | Md. C/risaaq Muuse Faarax | Wasiirka Wasaarada Dhalinyarada iyo Ciyaaraha | 12/05/2024 |
| 7. | Md. Dr. Rooble Cabdi Cilmi | Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga | 12/05/2024 |
| 8. | Md. Dr. Axmed Yuusuf Idiris | Wasiirka Isgaadhsiinta iyo Teknolojiyada | 12/05/2024 |
| 9. | Md. Maxamed Maydhane Ibraahim | Wasiir Ku-xigeenka W. Xanaanada Xoolaha | 12/05/2024 |
| 10. | Md. Maxamed Yuusuf Cilmi | Wasrii ku-xigeenka W. Waxbarashada | 12/05/2024 |
| 11. | Md. C/laahi Axmed Faarax | Gudoomiye ku-xigeenka H. Shaqaalaha | 12/05/2024 |
| 12. | Md. Cumar Cali C/laahi | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 12/05/2024 |
| 13. | Md. Saleebaana Jaamac Diiriye | Wasrii ku-xigeenka W. Horumarinta Maaliyada | 12/05/2024 |
| 14. | C/raxmaan Cismaan Cabdulle | Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka ah | 07/12/ 2024 |
| 15. | Siciid Axmad C/kariim | Xubin Komishanka Xuquuqal Insaanka ah | 07/12/ 2024 |

## Masuuliyiinta Qaran ee Goluhu Su'aalaha waydiiyay

Sannadkii 2024kii Masuuliyiinta Golaha hor yimi si Mudanayaashu su'aalo ugu waydiiyaan shaqada ay qaranka u hayaan waxay ahaayeen 4 Masuul:-

| N | Magaca Masuulka | Mawduuca Su'aalaha | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Dr. Sacad Cali Shire Wasaarada H. Maaliyada | Odoroska Miisaaniyada ee Sannadka 2024ka. | 13/01/2024 |
| 2. | Md. Khaalid Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawlada | Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada | 03/07/2024 |
| 3. | Dr Axmed Yuusuf Idis<br>Wasiirka W. Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda | Xeerka Amniga Tiknoolajiyada iyo Dembiyadda Tiknoolajiyadda Casriga ah (Cybersecurity & Cybercrime Act) | 30/11/2024 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 4. | Md. Cali Xasan Maxamed<br>Wasiirka W. Warfaafinta | Xeerka Saxaafada Somaliland | 28/12/2024 |

## Mooshinadii Golaha la horkeenay

| Taariikhda | Nuxurka Mooshinka | Cidda akhriday | Ansixintii |
|---|---|---|---|
| 07/01/2024 | Soo Jeedin Mooshin ku saabsan in Golaha Wakiilladu Qaraar Gole kaga jawaabo go'aan ka soo baxay Baarlamaanka Somaliya 01 January oo durayay madax-banaanida Somaliland, heshiiska is-afgarad ee dhexmaray Dawlada Somaliland iyo Itoobiya. | Md. Maxamed Xasan Siciid | La ansixiyay Goluhuna qaraar ka soo saaray |
| 07/01/2024 | Mooshin ku saabsan xil-gudashada golaha wakiilladda Jamhuuriyada Somaliland. | Md. Mustafe Axmed C/laahi (Khayreeye) | La Ansixiyay Goluhuna ka doodday |

## Ansixinta Odoroska Miisaaniyadaha Qaranka

### ➢ Odoroska Miisaaniyadda Qaranka ee Sanadka 2024ka

Sida Ku Cad Dastuurka Qodobkiisa 55[aad] Ogolaanshaha, dib u eegista, wax ka badalida iyo ansixinta Odoroska Miisaaniyadda Qaranka waxa awood buuxda uu dastuurka iyo xeerarka kale eed dalku u siiyeen Golaha Wakiillada, waxaana odoroska Miisaaniyadeedka sannadkasta soo diyaarisa Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, ka dibna waxa soo ansixiya Golaha Xukuumada intaanu Madaxweynuhu Golaha u soo gudbin, marka Madaxweynuhu soo gudbiyo ayay Wasaaradda Horumainta Maaliyaddu warbixin buuxda ka siisaa Golaha, isla markaana, Mudanayaasha Goluhu su'aalaha ay qabaan waydiiyaan Wasiirka iyo Masuuliyiinta Wasaaradda Maaliyadda.

Hadaba, Odoroska Miisaaniyad sannadeedka 2024-ka waxa Golaha loo soo gudbiyay **13 January 2024**, waxa Golaha Warbixin ka siiyay **Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyadda Dr. Sacad Cali Shire**, Iyadoo intaas ka dib, si toos ah Miisaaniyadda loogu wareejiyay Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga si ay u soo lafa-gurto, ka dibna, warbixin uga siiso Gole-waynaha, sida ku xusan Xeer-hoosaadka Golaha iyo Xeerka Maamulka Maaliyadda Xeer Lr.75/2016.

Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga ee Goluhu waxay ka soo shaqaynaysay Miisaaniyadda muddo bil iyo dheeraad ah, waxayna kulamo kala duwan la soo yeelatay qaybaha kala duwan ee ay khusayso ama ay u aragtay inay wax ka waydiiso. Guddidu waxa ay falanqayn iyo dood dheer ku samaysay Odoroska Miisaniyadda, sidoo kale, waxa ay la

tashiyo badan la yeelatay Hay'addaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn, iyada oo gunaanadkii falanqayn balaadhan ku samaysay Siyaasadda Miisaaniyadda iyo Madaxyada ay ka kooban tahay.

**03 March 2024** ayay Gudiddu Warbixn dheer oo aad u qiimo badan Golaha ku soo celisay, warbixintaas oo xambaarsanayd wax ka bedal iyo kala wareejin madaxyo iyo madax-xigeeno Miisaaniyadda ah.

Warbixintaas ka dib, wuxuu Golaha Wakiilladu isla fadhigaas oo ku taariikhaysan **03 March 2024 gudo** galay inuu ka guto waajibaadka shaqo ee uga hadhsan Miisaaniyadda, waxayna Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha Goluhu isla qaateen in Miisaaniyadda lagu ansixiyo wax ka badalka iyo kaabista ay Gudidda Dhaqaaluhu soo jeedisay. Intaas ka dib, wuxuu Goluhu Cod aqlabiyad ah ku Ansixiyay Odoroska Miisaanad Sannadeedka 2024ka oo wax ka badal aad u badan lagu sameeyay, wuxuun Goluhu u gudbiyay Madaxweynaha si waajibaadkiisa uga guto.

Madaxweyne Md. Muuse Biixi Cabdi ayaa **17/03/2024** Golaha dib ugu soo celiyay isagoo ka biyo diiday wax ka badelkii Goluhu ku sameeyay. Intaas kuma joogsane wuxuu Madaxweynuhu soo saaray degreeto ah in lagu dhaqmo Miisaaniyad sannadeedkii 2023kii, sidoo kale, Degreeto Wasiir oo ka soo baxday Wasaaradda Horumarinta Maaliyada ayuu Wasiir Dr. Sacad Cali Shire ku shaaciyay in dhamaan hay'addaha dawladdu ay ku dhaqmaan Miisaaniyad sannadeedkiii 2023kii,

Golaha Wakiilladu wuxuu **29 June 2024** u codeeyay soo jeedintii Madaxweynaha wuxuuna go;aan gole ku aqbalay soo jeedintii Madaxwayna wuxuuna Miisaaniyadda 2024kii ku ansixiyay sidii xukuumadu ugu soo gudbisay bilawgii sannadka.

Mar kale Madaxweynuhu wuxuu Golaha ku soo celiyay go'aankii ansixinta Miisaaniyadda ee sidii uu soo jeediyay loogu raacay, wuxuun sheegay in lagu dhaqmayo Miisaaniyaddii 2023kii. Sidaa darteed, Odoroskii Miisaaniyada 2024kii Xukuumadu keentay ee Goluhu labada Jeer ansixiyay waxay noqotay waxba kama jiraan oo may dhaqangalin, taas badelkeedana waxa Dawladdu ku shaqaynaysay Miisaaniyaddii 2023kii.

## Arrimaha kale ee Goluhu ka doodday

Sannadkii 2024kii waxa uu Goluhu ka doodday arrimo kale oo ku saabsanaa xaalada dalka, waxayna kala ahaayeen:-

1. **30 January 2024** wuxuu Goluhu dood dheer ka yeeshay Xaalada Guud ee Dalka dooddaas oo ay ka qayb-qaateen 11 Mudane.
2. **26 August 2024** Wuxuu Goluhu dood ka yeeshay dagaalka ganacsi iyo siyaasadeed ee dawladda Soomaaliya ku soo qaaday bulshada reer Somaliland.

## Go'aanadii Goluhu gaadhay Sanadkii 2024kii

Kal-fadhiyadii ee Goluhu yeeshay Sannadkii 2024kii wuxuu ku gaadhay go'aano kala duwan oo uu cod aqlabiyad ah ku ansixiyay, waxayna kala ahaayeen go'aanadaasi ansixinta Xeerar, Ansixinta Masuuliyiin Qaran, Ansixinta Miisaaniyado iyo Xisaab Xidho Miisaaniyadeed, Mooshino Golaha la horkeenay, tirada go'aanada uu gaadhay Goluhu sannadkaas waxay tiradoodu dhamayd **33 go'aan.** Shaxda hoose waxa lagu muujiyanayaa nooca go'aanka, taariikhda laga gaahay go'aanka iyo halka go'aankaasi u gudbay.

| No. | Go'aanka | T/la gaadhey | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Go'aanka diidmada ah ee burinta heshiiska is af-garadha ee dawladda JSL la gashay Ethipoia ee baarlamanka Somalia soo saaray | 08/01/2024 | Madaxweynaha |
| 2. | Go'aanka ansixinta wax-kabedelka & kaabista xeerka nidaamka ururada & Asxaabta qaranka xeer Lr. 14/2024 | 18/01/2024 | Madaxweynaha |
| 3. | Go'aanka ansixinta wax-kabedelka & kaabista xeerka guud ee doorashooyinka qaranka & diwaangelinta codbixiyayaasha xeer Lr. 91/2023 | 18/01/2024 | Madaxweynaha |
| 4. | Go'aanka ansixinta xeerka ciidanka qaranka xeer Lr. 105/2023 | 26/02/2024 | Madaxweynaha |
| 5. | Go'aanka ansixinta xeerka nidaamka garsoorka ciidanka qaranka xeer Lr. 107/2024 | 13/02/2024 | Golaha Guurtida |
| 6. | Go'aanka ansixinta odorska miisaaniyadda dawladda ee sannadka 2024-ka | 03/03/2024 | Madaxweynaha |
| 7. | Go'aanka wax-kabedelka & kaabista xeerka guud ee doorashooyinka xeer Lr. 91/2023 | 05/03/2024 | Madaxweynaha |
| 8. | Go'aanka ansixinta wax-kabedelka &kaabista xeerka nidaamka ururada &asxaabta qaranka xeer Lr. 14/2024 | 05/03/2024 | Madaxweynaha |
| 9. | Go'aanka ansixinta diidmada ah ee la xidhiidha adeegga DP world berbera uqabato shirkadaha wadaniga ah, sida NFMC iyo Oomaar international company. | 05/03/2024 | Madaxweynaha |
| 10. | Soo gudbin go'aanka ansixinta diidmada xubin komishanka doorashooyinka ka mid ah MD. Cabdicasiis Xirsi Warsame. | 07/03/2024 | Madaxweynaha |
| 11. | Go'aankii Ansixinta Ajnadaha Kal-fadhiga 8aad ee Golaha | 0505/2024 | Shir-gudoonka |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 12. | Go'aanka ansixinta xilka xubin guddida doorashooyinka qaranka Siciid Maxamed Cismaan | 06/05/2024 | Madaxweynaha |
| 13. | Go'aanka ansixinta xeerka ciidanka dab-demiska iyo sama-bixinta xeer Lr. 106/2023 | 27/05/2024 | Madaxweynaha |
| 14. | Go'aanka ansixinta wasiir W.dhalinyarada iyo ciyaaraha MD. Cabdirisaaq Muuse Faarax Cawad. | 03/06/2024 | Madaxweynaha |
| 15. | Go'aanka ansixinta wasiirka W. Gaashaan-dhigga ee JSL MD. Rooble Muuse Cabdi Cilmi | 03/06/2024 | Madaxweynaha |
| 16. | Go'aanka ansixinta wasiirka W. Horumarinta beeraha ee JSL MD. Axmed Maxamed Habbane | 03/06/2024 | Madaxweynaha |
| 17. | Go'aanka ansixinta wasiirka W. Horumarinta jidadka | 03/06/2024 | Madaxweynaha |
| 18. | Go'aanka ansixinta guddoomiyaha ku-xigeenka ha'adda shaqaalaha dawladda ee JSL MD. Cabdilaahi Axmed Faarax Mataan | 03/06/2024 | Madaxweynaha |
| 19. | Go'aanka ansixinta wasiirka W. Isgaadhsiinta iyo tiknoolajiyadda MD. Axmed Yuusuf Idiris Cawaale | 03/06/2024 | Madaxweynaha |
| 20. | Go'aanka ansixinta wasiirka W. Xidhiidhka golayaasha iyo arriamaha dastuurka MD. Cabdinaasir Muxumed Xasan Buuni. | 03/06/2024 | Madaxweynaha |
| 21. | Go'aanka ansixinta wasiirka ku-xigeenka wasaaradda houmarinta maaliyada MD. Saleebaan Jaamac Diiriye Guuleed. | 03/06/2024 | Madaxweynaha |
| 22. | Go'aanka asnixinta dib-us-celinta miisaaniyadda dawladda ee 2024-ka | 29/06/2024 | Madaxweynaha |
| 23. | Go'aanka ansixinta xubin guddida diwaangelinta ururada siyaasada iyo ansixinta asxaabta qaranka Cumar Cabdilaahi Badde | 03/06/2024 | Madaxweynaha |
| 24. | Go'aanka ansixinta xeerka ciidanka qaranka xeer Lr. 105/ 2023 | 10/07/2024 | Madaxweynaha |
| 25. | Go'aanka ansixinta xeerka nidaamka garsoorkaa ciidamada qalabka sida ee JSL | 10/07/2024 | Madaxweynaha |
| 26. | Go'aanka ansixinta xeerka Hy'adda hawlgabka iyo xaqsiinta shaqaalaha dawladda | 03/07/2024 | Golaha guurtida |
| 27. | Go'aanka golaha ee la xidhiidha soo | 03/07/2024 | Xeer-ilaalinta guud |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | jedinta maamuuska xayuubinta mudane Maxamed Abiib Yuusuf | | ee qaranka JSL |
| 28. | Go'aankii Ansixinta Ajnadaha Kal-fadhiga 9aad ee Golaha | 19/08/2024 | Shir-gudoonka |
| 29. | Go'aanka Ansixinta Xeerka Hawlgabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada | 03/09/2024 | G/Guurtida |
| 30. | Go'aanka golaha ee la xidhiidha ogaysiinta xadhigga mudane Maxamed Abiib Yuusuf | 09/09/2024 | Xeer-ilaalinta guud ee qaranka JSL |
| 31. | Go'aanka ansixinta xubin komishanka xuquuqal insaanka Cabdiraxmaan Cismaan Cabdulle | 09/12/2024 | Madaxweynaha |
| 32. | Go'aanka ansixinta xeerka nidaamka garsoorka ciidamada qaranka xeer Lr. 107/2024 | 09/10/2024 | Madaxweynaha |
| 33. | Go'aankii Ansixinta Ajnadaha Kal-fadhiga 10aad ee Golaha | 24/11/2024 | Shir-gudoonka |
| 34. | Go'aanka ansixinta xubin guddida diwaangelinta ururada siyaasada iyo ansixinta asxaabta qaranka Siciid Axmed Cabdikariim | 09/12/2024 | Madaxweynaha |
| 35. | Go'aanka ansixinta xeerka waxkabedelka & kaabista xeerka garyaqaanka guud ee S Somaliland xeer Lr. 89/2024 | 30/12/2024 | Madaxweynaha |
| 36. | Go'aanka ansixinta xeerka hay'adda hawl-gabka iyo xaqsiinta shaqaalaha dawaladda xeer Lr. 108/2024 | 30/12/2024 | Madaxweynaha |

# WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA 2024KII

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka, Kheyraadka Dabiiciga, wax soo saarka iyo Tamarta
4. Gudidda Arrimaha Bulshada
5. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska
6. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
7. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta iyo Maal-gashiga
8. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca
9. Gudidda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Technologyada
10. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay Golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan. Hadaba, iyadoo Gudi waliba Warbixineeda Golaha ka hor akhrin doonta waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii Gudiyada oo kooban.

## 1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Guddida joogtada iyo Ashaxu iyada oo Gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 54aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, Waxa ay Guddidu sanadkii 2024ka ay qabatay shaqooyin badan waxa ay kulamo la yeelatay Masuuliyiin kala duwan. Hadaba wax-qabadkii Gudidda oo kooban waxa uu ahaa sidan:-

### Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta  Qaran

- **29 April 2024** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka.
- **29 July 2024** Waxay Gudidda Joogtadu kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada **Md. Dr. Sacad Cali Shire.**
- **06 August 2024** Waxay Gudidda Joogtadu kulan la yeelatay Gudoomiyaha Bangiga Dhexe **Md. Cali C/laahi Daahir**

### Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **28 February 2024,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, waxaa Xubnaha cusub ee Gudidda Joogtada iyo Anshaxu **02 March 2024** yeesheen kulankoodii ugu horeeyay kaas oo ka soo qayb-galeen xubnaha cusub ee Gudiddu, iyagoo kulankaas ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. C/kariim Aadam Cumar (Cambe) Gudoomiye**
- **Md. Maxamuud Xayir Ducaale Gudoomiye ku-xigeen**

## 2. Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta

Guddida Deegaanka, Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-saarka iyo Tamartu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 58aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Sanadkii 2024ka waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **06 January 2024** Gudiddu kulan la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Horumarinta Xeebaha JSL, **Mudane Raabi Cabdi Maxamed**
- **07 January 2024** Gudiddu kulan la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Beeraha JSL, **Mudane Axmad Maxamed Habane**
- **15 May 2024 Waxay** Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay Hay'adda ka hortaga Aafooyinka iyo Kaydka Raashinka oo hogaaminayo Gudoomiyaha Hay'addaas **Md. Fasyal Cali Shiikh**
- **17 September 2024** Gudiddu waxay kulan xogwarysi ah la yeelatay Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Tamarkta **Md. C/laahi Faarax Cabdi**
- **25 September 2024** mar labaad ayay Guddidu kulan xogwarysi iyo dardargalinta wada-shaqayneed ah la yeelatay Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Tamarta **Md. C/laahi Faarax Cabdi**

### Mashaariicda Sharci ee ay Guddidu u gudbisay Gole-waynaha

- **08 January 2024** waxay Golewaynaha u soo gudbisay warbixina ka siisay **Xeerka Dakhliga Shidaalka** oo Gudiddu ka soo shaqaysay.

### Masuuliyiinta Qaran ee ay Gole-waynaha uga soo talo-bixisay

- **12 May 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Axmad Muxumad Habane Wasiirka Wasaarada Horumarinta Beeraha** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.
- **12 May 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Axmad Maydhane Ibraahim Wasiir Ku-xigeenka Xanaanada Xoolaha** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.

### Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **28 February 2024,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, waxaa Xubnaha cusub ee Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiicgu **29 February 2024** yeesheen kulankoodii ugu horeeyay kaas oo ka soo qayb-galeen xubnaha cusub ee Gudiddu, iyagoo kulankaas ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Saleebaan Maxamed Faarax Gudoomiye**
- **Md. C/kariim Meecaad Isaaq Gudoomiye ku-xigeen**

## 3. Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka

Guddida Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka Goluhu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 60[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Sanadkii 2024ka waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

1. **13 February 2024** waxay Kulamo la yeelatay Taliyaha Ciidanka Asluubta
2. **13 February 2024** waxay Kulamo la yeelatay Wasaarada Deegaanka iyo Isbadelka Cimilada **Marwo. Shukri Baandare.**
3. **20 March 2024** waxa Xubnaha cusub ee Gudiddaasi oo uu Gudoomiyaha cusub gudoonayo ay kulan la yeesheen **Hantidhawraha Guud ee Qaranka Md. Axmad Yuusuf Dirir.**
4. **21 April 2024** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi iyo isbarasho ah la yeelatay Komishanka Maamul Wanaaga oo Gudoomiyaha Komishankaasi **Md. Liibaan Ismaciil C/laahi** hogaaminayo.
5. **03 December 2024** Waxay Gudiddu kulan shaqo la qaadatay Duqa Caasimada ahn, Gudoomiyaha G/deegaanka Caasimada Hargeysa Md. C/kariim Axmad Mooge oo weheliyaan qaar ka mid ah Mudanyaasha G/deegaanka

### Kormeeridii & Safaradii ay Gudiddu samaysay

- **26-29 November 2024** Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxay safar iyo kormeer qaatay 3 maalmood ku tagtay **Gobolka Saaxil Magaalo madaxdiisa Bebera,** Safarkaas oo ujeedadiisu xog-ogaal u noqoshada Mashaariicdii ku jirtay Miisaaniyadii Sannadkii 2022kii madaama ay Gudiddu gacanta ku haysay Xisaab Xidhka Miisaaniyadii 2022kii, sidoo kale ay xog-ogaal ugu noqoto Hantida Qaranka ee guurtada iyo ma guurtada madaama lagu jiray xaalad kala guur oo xukuumadii cusub la doortay.
- **01 December 2024** Guddida ayaa kormeer iyo u xog-ogaal u noqosho ah sameeyay qaybo ka mid ah Hay'addaha Dawladda sida Wasaarada Gaadiidka iyo H. Jidadka, Ujeeddada kormeerkaas oo ahaa Ilaalinta Hantida Dawladda xilligan kala guurka ah iyo dabagalka Xisaab xidhka Dawladda ee Miisaaniyada sannadkii 2022-ka oo Guddidu gacanta ku hayso.
- **03 December 2024** Waxay Gudiddu kormeer shaqo la qaadatay ku tagtay Dawlada Hoose ee Caasimada iyadoo halkaas kula kulantay Duqa Caasimada ahn, Gudoomiyaha G/deegaanka Caasimada Hargeysa Md. C/kariim Axmad Mooge oo weheliyaan qaar ka mid ah Mudanyaasha G/deegaanka, intaas ka dib, guddidu waxay soo kormeertay mashaariic ay fulisay Dawlada Hoose oo ku jiray Miisaaniyadii 2022kii.

### Kulamadii Dadweyne (Public Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **28-29 August 2024** Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantidu waxay Kulan wada-tashi dadweyne oo ku Saabsan Naaqishada iyo ka tallabixin Xisaab Xidhka 2022kii ku qabatay Magaaladak kulankaas oo socday muddo laba maalmood ah waxa ka soo qaybgalay Masuuliyiin ka kala socday hay'addaha dawlada, aqoonyahano, khubaro iyo ururada arrimaha bulshada.

### Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **28 February 2024,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, waxaa Xubnaha cusub ee Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranku **29 February 2024** yeesheen kulankoodii ugu horeeyay kaas oo ka soo qayb-galeen xubnaha cusub ee Gudiddu, iyagoo kulankaas ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Maxamed Jaamac Liibaan Gudoomiye**
- **Md. Jaamac Axmad Oogle (Caano-boodhe) Gudoomiye ku-xigeen**

## 4. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

Guddida Dastuurka, Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanku iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 59[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Sanadkii 2024ka waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **06 January 2024** Waxay Guddidu kulan Xog-waraysi la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Dastuurka iyo Xidhiidhka Golayaasha JSL, **Mudane Cabdinaasir Muxumed Xasan Buuni**
- **03 July 2024** Waxay Guddidu kulan Xog-waraysi la yeelatay Komishanka Xuquuqal Insaanka
- **10 July 2024** Waxay Guddidu kulan Xog-waraysi la yeelatay Taliyaha Ciidanka Asluubta Sareeye Guuto Axmad Cawaale oo ay weheliyaan saraakiisha Ciidanka Asluubta ugu sar-saraysa,

### Masuuliyiintii ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay Ansixintooda.

- **07 December 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. C/raxman Cismaan Cabdule Xubin Gudidd Xuquuqal Insaanka ah** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.
- **07 December 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Siciid Axmad C/kariim Xubin Gudidd Xuquuqal Insaanka ah** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.

### Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **28 February 2024,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, waxaa Xubnaha cusub ee Gudidda Dastuurka, Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanku **02 March 2024** yeesheen kulankoodii ugu horeeyay kaas oo ka soo qayb-galeen xubnaha cusub ee Gudiddu, iyagoo kulankaas ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Jamaal Cali Aadam Gudoomiye**
- **Md. Maxamed Jaamac Ismaaciil (Kood-buur) Gudoomiye ku-xigeen**

## 5. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

Guddida Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 61[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Sanadkii 2024ka waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **20 January 2024 waxay kulamo la yeesheen**
    - Hantidhawrha Guud ee Qaranka **Mudane Axmad Dirir**
    - Gudoomiyaha Bangiga Dhexe Mudane
    - Wasiirka Wasaarada Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka
    - Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada Dr. Sacad Cali Shire
- **21 January 2024 waxay kulamo la yeesheen**
    - Gudidda Doorashooyinka Qaranka
    - Gudoomiyaha Bangiga Dhexe Mudane
    - Wasaarada Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska.
- 27 **January 2024** waxay kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada Dr. Sacad Cali Shire
- **01 Februari 2024** waxay kulan la yeelatay Machadka ISIR think tank oo ay ka dhagaysatay falanqayn ku saabsan Odoroska Miisaaniyada 2024ka.
- **21 January 2024 waxa Gudoomiyaha iyo Xubnaha cusub ee Gudiddu kulan isbarasho la yeesheen**
    - Gudoomiyaha Bangiga Dhexe **Md. Cali C/laahi Daahir**
    - Hantid-dhawrka Guud oo ku-xigeenka Hantidhawrha Guud **Md Sacad Riiraash** ka socday
- **14 March 2024 xubnaha cusub ee Gudiddu** waxay kulan isbarasho la yeelatay Gudidda Maamul Wanaaga oo uu hogaaminayo Gudoomiyaheeda **Md. Liibaan Ismaaciil C/laahi.**
- **20 March 2024** waxay kulna isbarasho ah la yeelatay madaama Xubnaha Gudiddu cusub yihiin Wasiirka Wasaarada H. Maaliyada Md. Dr. Sacad Cali Shire.
- **02 July 2024** Waxay Gudiddu kulan la yeelatay **bahda Garsoorka iyo Ururka Qareenada Somaliland**, kulankaas oo ujeedadiisu ahayd inay kala tashato Xeerka Rahanta Hantida Ma-guurtada oo Gudiddu gacanta ku haysay.
- **03 July 2024** Waxay Gudiddu kulan la yeelatay Masuuliyiin ka socday Baananka Ganacsiga ee Dalka, kulankaas oo ujeedadiisu ahayd inay kala tashato Xeerka Rahanta Hantida Ma-guurtada oo Gudiddu gacanta ku haysay

### Kulamadii Dadweyne (Public Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **10-11 June 2024** Guddida Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadu waxay Kulan wada-tashi dadweyne ku Saabsan Naaqishada Rahanka Hantida Ma-guurtada ah, kaas oo socday muddo laba cisho ah ku Qabatay Damal Hotel Hargiesa.

### Kormeeridii & Safaradii ay ku Tagtay Gobolada Galbeedka

- **23 September 2024** Gudidda Dhaqaaluhu waxay safar iyo kormeer qaatay 3 maalmood ku tagtay **Gobolka Saaxil Magaalo madaxdiisa Bebera,** Safarkaas oo ujeedadiisu ahayd kormeerida ilaha Dhaqaalaha Dalka iyo guud ahaan qaybaha hay'addaha dawlada ee ka hawl-gala Magaalada Berbera.

- **29 September 2024** Gudidda Dhaqaaluhu waxay safar iyo kormeer ku tagtay **Degmada Gabilay** Safarkaas oo ujeedadiisu ahayd kormeerida ilaha Dakhli ee Dalka.
- **Sidoo kale 30 September 2024** Gudidda Dhaqaaluhu waxay safar iyo kormeer qaatay 2 maalmood ku tagtay **Gobolka Awdal magaalo madaxdiisa Boorama,** Safarkaas oo ujeedadiisu ahayd kormeerida ilaha Dakhli ee Dalka.

**Masuuliyiintii ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay Ansixintooda.**

- **12 May 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Saleebaan Jaamac Diiriye Wasiir Ku-xigeenka H. Maaliyada** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.

**Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.**

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **28 February 2024,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, waxaa Xubnaha cusub ee Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadu **02 March 2024** yeesheen kulankoodii ugu horeeyay kaas oo ka soo qayb-galeen xubnaha cusub ee Gudiddu, iyagoo kulankaas ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Xuseen Ismaaciil Jaamac Gudoomiye**
- **Md. Abiibokor Siciid Cali Gudoomiye ku-xigeen**

## 6. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska.

Guddida Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoysku iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 63[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Sanadkii 2024ka waxay kala ahaayeen sidan:-

**Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka**

- **28 May 2024** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay Gudidda Wanaag Farista iyo Xumaan Reebista Qaranka.
- **28 May 2024** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay Wasiirka Wasaarada Diinta iyo Awqaafta **Md. Maxamed X. Aadam Cilmi**
- **20 July 2024** Waxay Guddidu kulan la yeelatay Habalaha ka shaqeeya Dacwada iyo Fidinka Diinta Islaamka oo ay hogaaminayso **Marwo Shiikhad Nasiim Sh, Aadam Siiro.**

**Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.**

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **28 February 2024,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, waxaa Xubnaha cusub ee Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoysku **02 March 2024** yeesheen kulankoodii ugu horeeyay kaas oo ka soo qayb-galeen xubnaha cusub ee Gudiddu, iyagoo kulankaas ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Barkhad Jaamac Batuun Gudoomiye**
- **Md. Xuseen Aadam Cade Gudoomiye ku-xigeen**

## 7. Guddida Arr. Dibadda, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maal-gashiga

Guddida Arrimaha Dibada, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maalgashigu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 57[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Sanadkii 2024ka waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **29 April 2024** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay Wasiirka Wasaarada Maalgashiga **Md. C/risaaq Ibraahim Maxamed**

- **29 April 2024** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ku saabsan hawlaha uu ay Wasaaradiisu Qaranka u hayso la yeelatay Wasiirka Wasaarada Qorshaynta **Md. Axmad Toorno.**

### Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **28 February 2024,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, waxaa Xubnaha cusub ee Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashiga Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maal-gashiga **29 February 2024** yeesheen kulankoodii ugu horeeyay kaas oo ka soo qayb-galeen xubnaha cusub ee Gudiddu, iyagoo kulankaas ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Maxamed Xasan Siciid Gudoomiye**
- **Md. C/naasir Yuusuf Cismaan (Qodax) Gudoomiye ku-xigeen**

## 8. Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada

Guddida Hawlaha Guud, Tiknoolajiyadda, Guryeynta & Dhulka iyaga oo Gudanaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 62[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Sanadkii 2024ka waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

6. **03 January 2024** waxay kulan la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka JSL, **Mudane Saleebaan Cawad Cali Bukhaari**
7. **03 Januariy2024** waxay kulan la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolojiyada JSL, **Mudane Axmad Yuusuf Idiris Cawaale**
8. **21 Januariy 2024** waxay Kulamo la yeelatay Shirkadaha xogaha kala duwan ee la xidhiidhka tiknoolojiyada haya
9. **13 February 2024** waxay Kulamo la yeelatay Taliyaha Ciidanka Asluubta
10. **21 May 2024** Gudiddu waxay kulan is barasho iyo xog-waraysi la qaatay Ururada Aan Dawliga Ahayn (Somaliland NGO Board Members)
11. **09 July 2024** waxay Kulamo la yeelatay Golaha Deegaanka Caasimada Hargaysa oo hogaaminayo ku-xigeenka Duqa Caasimada Md. Khadar Axmed Cumar.

## Mashaariicda Sharci ee Golewaynaha u soo gudbisay

- **01 December 2024** waxay Golewaynaha u soo gudbisay warbixina ka siisay **Xeerka Amniga Tiknoolajiyada iyo Dembiyadda Tiknoolajiyadda Casriga ah**

## Masuuliyiintii ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay Ansixintooda.

- **12 May 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Axmad Yuusuf Idiris Cawaale Wasiirka Wasaarada Isgaadhsiinta iyo Tiknoolojiyada** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.
- **12 May 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Raabi Cabdi Muxumad Wasiirka Wasaarada Gaadiidka iyo H. Jidadka** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.

## Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **28 February 2024,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, waxaa Xubnaha cusub ee Gudidda Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknoolojiyadu **02 March 2024** yeesheen kulankoodii ugu horeeyay kaas oo ka soo qayb-galeen xubnaha cusub ee Gudiddu, iyagoo kulankaas ku doortay gudoonka **cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala** doorteen:-

- **Md. Axmed Cabdi Ibraahim (Timo-jilic) Gudoomiye**
- **Md. Jamaal Aadam Diiriye Gudoomiye ku-xigeen**

## 9. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca

Guddida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyadu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 55aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Sanadkii 2024ka waxay kala ahaayeen sidan:-

## Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **13 March 2024 waxa Gudoomiyaha iyo Xubnaha cusub ee Gudiddu kulan isbarasho la yeesheen**
    - Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga **Md. Dr. Rooble Muuse Cabdi iyo Agaasimaha Guud ee W. Gaashaandhiga Md. Foosi Maxamed Faarax**
    - Hantid-dhawrka Guud oo ku-xigeenka Hantidhawrha Guud **Md Sacad Riiraash** ka socday
- **20 March 2024** waxay Kulan Xogwareysi ah la yeelatay **Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka.**
- **18 April 2024** Waxay Gudiddu kulan xogwaraysi ah la yeelatay **Md. Siciid Maxamed Cismaan** oo ah Xubin Cusub oo Komishanka Doorashooyinka ah, xubintaas oo sida Xeerka Doorashooyinka Guud dhigayo Golewaynaha u gudbin doonto warbixin ka siin doonto si xilkaas loogu ansixiyo.
- **18 April 2024** waxay Gudiddu kulan xogwaraysi ah la yeelatay Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga **Md. Rooble Muuse Cabdi Cilmi** oo cusub si ay Golewaynaha tallo-bixin

uga siiso ansixintiisa.

- **30 April 2024** waxay Gudiddu Kulan la Yeelatay Wakiilka Xafiiska UK ee Somaliland, Kulanka oo lagaga Hadlay Xeerar Guddidu ay Gacanta ku hayso & Arimaha Doorashooyinka Ee Sanadkan Qorshaysan.
- **27 August 2024** waxay Guddidu kulan la yeelatay Masuuliyiin khubaro ah oo ka trisan Xafiiska UK ee Somaliland.
- **Sidoo kale 10 December 2024** waxay Guddidu kulan la yeelatay Masuuliyiin khubaro ah oo ka trisan Xafiiska UK ee Somaliland, ujeedada kulankaas oo ahaa dhamaystirka iyo dardargalinta Xeerarka Amniga ee ay gudiddu gacanta ku hayso.

### Masuuliyiinta Qaran ee ay Gole-waynaha uga soo talo-bixisay

- **06 May 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Siciid Maxamed X. Cismaan Xubin Komishanka Doorashooyinka Qaranka** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo..
- **12 May 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Rooble Cabdi Cilmi Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.
- **12 May 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Cumar Cali C/laahi Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axsaabta Siyaasada** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.

### Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **28 February 2024,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, waxaa Xubnaha cusub ee Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranku **02 March 2024** yeesheen kulankoodii ugu horeeyay kaas oo ka soo qayb-galeen xubnaha cusub ee Gudiddu, iyagoo kulankaas ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- **Md. Aadam Cismaan Xarbi Gudoomiye**
- **Md. Axmad Maxamuud C/laahi (Fanax) Gudoomiye ku-xigeen**

## 10.Gudidda Arrimaha Bulshada

Guddida Arrimaha Bulshada iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 64aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Sanadkii 2024ka waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **25 April 2024** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi iyo ka dhagaysi Warbixin shaqada ay qaranka u hayaan la qaadatay Wasiirka Wasaarada Waxbarashada iyo Gudidda Imtixaanaadka Qaranka.

- **11 May 2024** waxay Gudiddu kulan la yeelatay Saraakiil ka socotay Hay'adda Shaqaalaha Dawlada iyadoo kala naaqishoonaysay arrimo ku saabsan Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada oo Gudiddu gacanta ku haysayl.

- **28 December 2024** waxay Gudiddu kulan hawleed la yeelatay Ururada Saxaafada Somaliland, kulankaas oo ujeedadiisu ahayd geedi socodka naaqisha wax ka badelka Xeerka Saxaafada oo Gudiddu gacanta ku haysay.

- **05 September 2024** waxay Guddidu kulan la yeelatay Madaxda sare ee **Hay'adda Save the Childer.**

- **12 September 2024** Gudidda Arrimmaha Bulshadu waxay kulan la qaadatay **Ururada Arrimaha Bulshada ka shaqeeya ee Somaliland** kulankaas oo ujeedadiisu ahayd wada-shaqaynta Gudidda iyo Ururada Arrimaha Bulshada madaama Gudiddu gacanta ku hayso Xeerar badan oo arrimaha bulshada khuseeya sida kuwa Caafimaadka.

## Mashaariicda Sharci ee Golewaynaha u soo gudbisay

- **26 May 2024** waxay Golewaynaha u soo gudbisay warbixina ka siisay **Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada.**

## Kormeeradii Gudiddu samaysay

- Guddida Arimaha Bulshadu waxay **05 September 2024** Kormeer Shaqo ku tagay Cusbitaalka Guud ee Hargeysa, Halkaas oo uu ku soo dhaweeyey Agaasimaha Guud Ee cisbitaalka Dr. Cabdiraxman Maxamed Cismaan, kormeerkaas oo Gudiddu u kuurgalasay xaalada Cisbitaalka iyo bukaanka ku sugan iyo sidoo kale sida ay u socdaan adeegyada caafimaad ee uu bulshada Caasimada u qabto.

## Kulamadii Dadweyne (Public Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **13 April 2024** Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha ayaa Kulan wada-tashi dadweyne ku Saabsan Naaqishada Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada ku Qabatay Hotel Casood Hargeysa.
- **01 May 2024** Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha ayaa Kulan wada-tashi dadweyne ku Saabsan Naaqishada Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada ku qabatay Magaalada Boorama ee Gobolka Awdal.
- Sidoo kale, **08 May 2024** Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha ayaa Kulan wada-tashi dadweyne ku Saabsan Naaqishada Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada ku qabatay Magaalada Burco ee Gobolka Tog-dheer
- **28 December 2024** waxay Gudidda Arrimaha Bulshadu daah-furtay Qorshaheeda iyo Ajandaha Xeerar u qorshaysna inay ka shaqayso.

## Masuuliyiintii ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay Ansixintooda.

- **12 May 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. C/risaaq Muuse Faarax Wasiirka Wasaarada Dhalinyarada iyo Ciyaaraha** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.
- **12 May 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. Maxamuud Yuusuf Cilmi Wasiir ku-xigeenka Waxbarashada iyo Sayniska** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.

- **12 May 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. C/laahi Axmad Faarax Gudoomiye ku-xigeenka Hay'adda Shaqaalaha Dawlada** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.

## Is-badelkii Xubnaha iyo Doorashadii Gudoonka Gudidda.

Ka dib, markii Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin Maxamuud Xiir** uu **28 February 2024,** sameeyay isku shaandhaynta Xubnaha Gudiyada Golaha, waxaa Xubnaha cusub ee Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranku **02 March 2024** yeesheen kulankoodii ugu horeeyay kaas oo ka soo qayb-galeen xubnaha cusub ee Gudiddu, iyagoo kulankaas ku doortay gudoonka cusub ee Gudidda, waxayna Gudoomiye iyo ku-xigeen Gudoomiye u kala doorteen:-

- Md. Axmad Jaamac Khaliif Gudoomiye
- Md. Axmad C/kariim Ducaale (Walhad) Gudoomiye ku-xigeen

## Gudiyada Gaarka ahaa

Marka laga yimaado Gudiy hoosaadyada joogtada ah (Standding Commiittees) waxa kale oo jira Gudiyo gaar ah (Ad hoc Committee) Goluhu u saaro arrin markaa taaan si ay uga soo shaqeeyaan, iyadoo muddada shaqadoodu ku eegtay intay ku jiraan hawsha loo xilsaaray oo kaliya. Hadaba, sannadkii 2024kii wuxuu Gudoonka Goluhu magacaabay gudiyo gaar ah (ad hoc committees), kuwaas oo loo xilsaaray inay ka soo shaqeeyaan ka dibna Golaha uga soo talla-bixiyaan mawduuca shaqada loo xilsaaray, waxayna kala ahaayeen: -

1. Gudi gaar ah oo loo saaray Xeerkii Ciidanka Qaranka.
2. Gudidda Gaarka ah ee loo xilsaaray u kuurgalida iyo soo qiimaynta arrintii la xidhiidhay Tacriifada ee u dhaxaysay Shirkada Waddaniga ah ee NFMC iyo Shirkada DP World

***AHN GEERIDII MADAXWEYNIHI HORE MD. AXMAD SIILANYO.***

**16 November 2024** Waxa Magaalada Hargaysa ku geeriyooday AHN Madaxweynihii hore ee Somaliland **Mudane Axmed Maxamed Maxamuud Siilaanyo**, Madaxweyne Siilaanyo waxa uu ka mid ahaa shaqsiyaadka ugu taariikhda weyn siyaasiyiinta Somaliland iyo guud ahaan cariga soomaalida. Xilkii ugu danbeeyay ee uu qabtay ayaa ahaa jagada Madaxweynenimo ee Somaliland (2010-2017) isagoo ahaa Madaxweynihii afraad ee Somaliland. Geerida Madaxweynaha ayaa ku soo beegantay wakhti saddex caano maal ka hor dalka ay ka dhacay doorashooyin isku sidkan oo ahaa doorashada Madaxtooyada iyo doorashada Ururada iyo Axsaabta Siyaasada.

Waxaana AHN aas-qaran loogu sameeyay Xabaalaha Baqiic ee Magaalada Hargaysa aaskaas qaran waxa ka qayb-galay Madaxwaynaha Md. Muuse Biixi Cabdi, Gudoomiyaha Golaha Wakiillada Md. Prof. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon), Xildhibaanada Golayaasha Baarlamaanka, Wasiirro, wufuud ka socotay dalalka deriska, madaxda axsaabta qaranka, siyaasiyiin, haldoor, culimo iyo dadweyne aad u tiro badan oo isaga kala yimi daafaha dunida iyo dalka gudihiisa, iyadoo madaxda ka qayb-gashay aasku tacsi u direen shacabka Somaliland, isla markaana xuseen taariikhdii muga lahayd iyo doorkii oo ku lahaa dib u dhiska Somaliladn iyo Hal-gankii ka horeeyayba.




AHN Madaxweynihii Afraad ee Jamhuuriyadda Somaliland, Marxuum Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo), ayaa kamid ahaa tiirarkii ugu waaweynaa ee hoggaaminayey halgankii qadhaadhaa ee dib-u-xoraynta, waxana uu muddo ka badan toddoba sannadood ahaa madaxweynaha qaranka, isaga oo fuliyey waxqabad ballaadhan oo gobollada iyo degmooyinka dalka, kuwaas oo kamid ah waxyaabaha ugu mudan taariikhdiisa muddadaas uu dalka hoggaaminayey.

## *TABOBARADA & AQOON KORODHSIYADII*

**3 January 2024-ka,** waxa tababar laba maalmood ah loo qabtay Agaasimayaasha iyo Agaasime-xigeennada Golaha Wakiilada, kaas oo ku saabsanaa qaabka loo diyaariyo qorshe-hawleedka Waaxaha Maamulka. Tababarkan oo lagu qabtay qolka shirarka ee Golaha waxa fududeeyey hay'adda IRI, waxaana bixiyey Shirkadda HASI Consulting. Tababarkan ayaa waxa aad uga faa'iideystey mas'uulliyinta Waaxaha Golaha, maadaama oo uu ku soo beegmay xili ay taahan tahay diyaarinta qorshe-sanaddeedyada Waaxaha Golaha, si waafaqsan Qorshaha guud ee Golaha Wakiilada.

**10 December 2023-ka,** kulan aqoon-isweydaarsi oo la xidhiidha qabyo-tirka **Buugga Hab-Adeegsiga Shaqada Iyo Awooddaha Guddiyada** ayaa Xoghayayaasha Guddiyada loogu qabtay hoolka shirarka ee Xarunta Golaha Wakiilada, kullankaas oo uu furray Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada **C/risaaq Siciid Ayaanle.** Habraaca Guddiyada ayaa loogu talogalay inay ka faa'iideystaan Xubnaha Guddiyada iyo Shaqaalaha ka hawl-gala xafiisyada Guddiyadu.



*Mas'uulliyiinta Waaxaha Golaha oo qaadanaya tababar la xidhiidha dejinta Qorshe-sanaddeedka*

Buugaasi Waxa uu ka dhigan yahay daabacaadii koowaad ee uu soo saaro Maamulka Xoghaynta Golaha Wakiiladdu si waafaqsan Xeer-hoosaadka Golaha. Buugga Hab-Adeegsiga Shaqada Iyo Awooddaha Guddiyada waxa uu qayb ka yahay aa'laddaha kala duwan ee Golaha, sida Hagayaasha, Hab-raacyada, Siyaasaddaha, Dastuurka iyo Xeerarka, kuwaas oo Goluhu u adeegsado xil-gudashadiisa.



*Xoghayaha Guud ee Golaha oo sharaxaad kooban Xoghaymaha Gudiyada ka siinaya Buuga Hab-adeegsiga shaqada Gudiyada*

## ***XADHIGII XILDHIBAAN MAXAMED ABIIB YUUSUF***

**20 July 2024** ayuu Xeer-ilaaliyaha Guud uu Golaha u soo gudbiyay Warqad u uku codsanayo in Goluhu Maamuuska ka xayuubiyo **Xildhibaan Maxamed Abiib Yuusuf**, Wuxuuna Shir-gduoonka Goluhu Gudidda Joogtada iyo Anshaxa u gudbiyay si ay uga soo tallo-bixiyaan codsiga Xeer-ilaaliyaha.

Kal-fadhi aan caadi ahayn oo Goluhu yeeshay **27 July 2024** ayay Guddida Joogtada iyo Anshaxu talladeedii Golaha u soo gudbisay Golewaynaha, waxayna Guddiu gabi ahaanba eedaynta maamuus ka xayuubinta ee Xeer-ilaaliyaha guud iyo sababaha dacwadiisa ay cadaysay in eedayntaasi tahay mid aan sharci ahayn isla markaana ka horimanaysa masuuliyada xil-gudasho ee Mudanayaasha ee ku tilmaaman Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha.

Wuxxuuna isla fadhigaas Goluhu cod ugu qaaday diidmada eedayta iyo codsiga maamuus ka xayuubinta Xildhibaan Maxamed Abiib iyadoo Goluhu codkaas ku diiday Codsiga Maamuus ka xayubinta Xeer-ilaaliyaha Guud Golaha u soo gudbiyay.




**02 September 2024** ayaa Xildhibaan Maxamed Abiib Yuusuf la xidhay isagoo ka soo degaya Madaarka Cigaal ee Magaalada Hargaysa, waxaana Xeer-ilaaliyaha Guud mar labaad Golaha u soo gudbiyay warqad ah wargalin in Xildhibaanka la qabtay isagoo dambi faraha kula jira, sidoo kale wuxuu mar labaad Golaha ka codsaday inay maamuus ka xayuubin ku sameeyay Xildhibaanka, wuxuuna isla maalintaas la Xidhay Xildhibaan wuxuu Goluhu soo saaray war-saxaafadeed in si sharci daro ah loo xidhay isla maraana aan la qaban isagoo faraha dambi kula jira sida ku xusan Qodobka 49aad Farqadiisa 4aad oo sheegaysa in Xildhibaan la xidhi karo oo kaliya marka la qabto isagoo dambi faraha kula jira, sidaa darteed, wuxuu Goluhu bulshada u cadeeyay in xadhigaas aan loo marin sifo sharci ah, wuxuu hay'addaha amniga ku wargaliyay in si degdeg ah xoriyadiisa loogu soo celiyo Xildhibaanka,

Hadaba **03 September 2024** fadhi uu Goluhu yeeshay oo ka soo xaadireen **57 Mudane** cod ugu qaaday soo jeedinta maamuus ka xayuubinta, waxaana diiday 51 Mudane, halka 3 Mudane ogolaadeen, 2 Mudane ka aamsuyeen.

**08 September 2024** ayuu Goluhu u yeedhay Xeer-ilaaliyaha Guud si wax looga waydiiyo Xadhiga Xildhibaan Maxamed, isla markaana codsi labaad oo Xeer-ilaaliyaha Guud Golaha u soo gudbiyay kaas oo uu kaga dalbanayay Maamuus ka xayuubinta Xildhibaanka oo uu sheegay in diidmadii hore ee Goluhu aanay ansax ahayn madaama **55 Mudane** tirada diidmada aanay gaadhayn. Xeer-ilaaliyaha Guud kamuu soo jawaabin warqadii yeedhmada, mana uu hor imanan Golaha.

Hadaba, Fadhigii maalintaas wuxuu Goluhu mar labaad cod ku diiday soo jeedinta Xeer-ilaaliyaha Guud ee maamuus ka xayuubinta Xildhibaan Maxamed Abiib, wuxuuna sidaas mar labaad Goluhu ku buriyay soo jeedintii Xeer-ilaaliyaha iyo xadhiga sharci darada ah ee Xildhibaanka lagu xidhay.

**24 September**, Golaha Wakiillada ayaa Maxkamada Dastuuriga ah u gudbiyay dacwad la xidhiidha Xadhiga **Xildhibaan Maxamed Abiib Yuusuf** taas oo Goluhu ka codsaday inay go'aamiso sharcinimada xadhiga Xildhibaanka maadaama Goluhu laba jeer cod ku diiday xadhiga xildhibaanka iyo in xasaanada laga qaado sida uu soo dalbaday Xeer-ilaaliyaha Guud. Sidoo kale, Xeer-ilaaliyaha Guud ayaa isna dacwad taas ka dhan ah u gudbiyay Maxkamada Dastuuriga ah **29 September**
**30 September 2024,** Maxkamada Sare ee Dastuuriga ah ayaa qaraar ja sii soo saartay dawcada Goluhu u gudbiyay waxayna Maxkamadau soo saartay in go'aamadan:-

1. Maxkamada Dastuuriga ahi waxay aqbashaday codsigii Golaha Wakiillada ee sharcinimada xadhiga Xildhibaan Maxamed Abiib.
2. Maxkamada Dastuuriga ah waxay diiday dacwadii Xeer-ilaaliyaah Guud ee furashada dacwad ku saabsan xadhiga Xildhibaanka.
3. Waxay qaraarisay in xabsi ku haynta **Xildhibaan Maxamed Abiib** uu yahay sharci darro maadaama Golaha Wakiilladu cod aqlabiyad ah ku diideen maamuus ka xayuubinti Xeer-ilaalinta u gudbiysay si waafaqsan Qodobka 79$^{aad}$ iyo Qodobka 49$^{aad}$ Farqadiisa 3$^{aad}$ ee Dastuurka JSL.
4. Waxay xoriyadiisa u celisay Xildhibaan Maxamed Abiib, waxayna fartay Taliyaha Ciidanka Asluubtu inuu xabsiga ka sii daayo Xildhibaana isla maaalintaas 30 bisha.
5. Waxay u soo jeedisay hay'addaha Dawlada inay dhawraan oo u hogaansamaan dastuurka Dalka.

Waxaan isla maalintaas ku taariikhaysan **30 September 2024kii** Xabsiga laga sii daayay **Xildhibaan Maxamed Abiib Yuusuf** oo muddo 28 maalmood ah Xabsiga Mandheer si sharci darro ah ugu xidhnaa xoriyadiisiina dib u helay.

## DOORASHOOYINKII NOVEMBER 2024

**November 2024** waxa guud ahaan Dalka Jamhuuriyada Somaliladn looga dareeray doorashooyinka isku sidkan ee doorashada Madaxtooyada iyo doorashada tooska ah ee Ururada iyo Axsaabta Siyaasada, doorashadan oo ah doorashadii sideeddaad ee ay Somaliland qabsato tan markii 2001kii dalku yeeshay Dastuur jidaynaya doorashada qof iyo cod in lagu doorta madaxda dalka.

Doorashada Madaxtooyada oo ay ku tartamayeen saddexda xisbi siyaasi ee Kulmiye, Waddani iyo UCID oo ay ka sharaxnaayeen Madaweynaha xilka hayay **Md. Muuse Biixi Cabdi** oo ka sharaxan **Xisbiga Kulmiye, Md. C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)** oo iska ka sharaxan **Xisbiga Waddani** iyo **Md. Faysal Cali Waraabe** oo **Xisbiga UCID** ugu sharaxnaa Madaxweyne, halka Doorashada tooska ah ee Ururada ay ku tartamayeen saddexda Xisbi Siyaasi iyo 6 Urur siyaasadeed oo Gudiddu Diiwaangalinta Ururada iyo Axsaabta Siyaasaddu soo saareen liiskooda si ay doorashadaas tooska ah ugu tartamaan.




**13 bisha November** waxa 7:00 AM guud ahaan dalka loo dareeray goobaha cod-bixinta taas oo socotay ilaa gabal dhicii maalintaas iyadoo goobaha qaar cod-bixintu ay gaadhay saqdhexe, waxaana sida Gudiddu doorashooyinku cadeeyeen u Diiwaangashanaa inay codkooda dhiibtaan 1, 227,084 Cod-bixiye oo ka codaynaya 1,235 goob codayneed oo dalka oo dhan ah.

Waxayna doorashadaasi si Nabadgalyo ah oo aanay wax dhibi habayaraatee ka dhicin uga qabsoomeen dalka, iyadoo dadkuna si degan oo nabad ah codkooda u dhiibteen.

**November 19, 2024** Koomiishanka Doorashooyinka Somaliland ku dhawaaqay in **Md.**

**Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro)** loo doortay madaxweynaha 6aad ee Somaliland, sidoo kale, xisbiga Waddani, ururka Kaah iyo xisbiga Kulmiye ay xisbinimo ku guulaystay, iyadoo doorashada Madaxtooyada Tirada guud ee codadka la dhiibtay guud ahaan noqotay **647,863** cod, halka tirada guud ee codadka ansaxay lagu sheegay **638,126 cod,** sidoo kale **9,528 cod** ayaa xumaaday. **Md. Cabdiraxmaan Cirro** oo ka sharaxnaa xisbiga Waddani ayaa ku guulaystay codad dhan **407,908 cod** oo u dhiganta **63.92%,** Madaxweyne **Md. Muuse Biixi Cabdi**, oo ka sharaxnaa xisbiga Kulmiye isna helay **225,519 cod** oo u dhiganta **34.81%,** halka uu musharixii xisbiga UCID **Md. Faysal Cali Waraabe** uu helay **4,699 cod** oo u dhiganta **0.74%.**

Dhanka kale Doorashada xisbiyada oo ku lamaanayd doorashada Madaxtooyada ayaa tirada guud ee codaysay lagu sheegay **646,188 cod** oo u dhiganta 53% tiradiii guud ee cod-bixiyayaasha diiwaangashanaa, waxa ansaxay **630,812 cod** oo u dhigma **98%.**

waxayna u kala guulasteen sidan

1. **Xisbiga Waddani** wuxuu helay **216, 284 cod**
2. **Ururka Kaah** wuxuu helay **131,507 cod**
3. **Xisbiga Kulmiye** wuxuu helay **108,100 cod**
4. **Ururka Horseed** wuxuu helay **78,218 cod**
5. **Ururka Hilaac** wuxuu helay **59,569 cod**
6. **Ururka Barwaaqo** wuxuu helay **16,852 cod**
7. **Xisbiga UCID** wuxuu helay **10,105 cod**
8. **Ururka Talo-wadaag** wuxuu helay **6,080 cod**
9. **Ururka Shacabku** wuxuu helay **2014 cod**

Sidaa darteed, **Xisbiga Waddani, Ururka Kaah iyo Xisbiga Kulmiye** ayaa noqday **saddex xisbi qaran ee Somalilad** ka tartami doona **10 sanno** ee soo socda oo ku guulaystay doorashada tooska ah November 2024 ee

## Gudoomiyaha Golaha oo Xafiiskiisa kula kulmay Ururka SOLJA

Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon**) ayaa **08 May 2024** Xafiiskiisa kulan kula yeeshay saraakiil ka socotay Ururka Suxufiyiinta Somaliland ee loo soo gaabiyo SOLJA, kulankaas oo ujeedadiisu ahayd sidii looga wada shaqayn lahaa Xeerka Saxaafada Somaliland oo diyaarintiisa socoto, sid xeerkaas u noqon lahaa mid wax wayn ka tara baahiyaha sharci ee Saxaafada Somaliland, waxayna Madaxda SOLJA iyo Gudoomiyuhu islagarteen hanaankii xeerkaas wax ka badelkiisa iyo kaabistaa looga wada qayb qaadan lahaa isla markaana si hufan ay uga wada shaqayn lahaayeen dhamaan hay'addaha ku shaqada lihi si xeerkaas oo hufan loo meel marin lahaa.




**Gudoomiyaha oo xafiiskiisa kula kulmaya Saraakiisha Ururka Saxafiyiina Somaliland ee SOLJA.**

## *SAFARADII DALKA DIBADDIISA LOOGU BAXAY*

### ➢ Safarkii Gudoomiyaha Golaha ee Dalka UK

**April 7, 2024** Gudoomiyaha Golaha Wakiilladda JSL **Md Prof. Yaasiin Madamuud Xiir (Faratoon)** oo Safar ku joogay Dalka UK ayaa kulan la yeeshay Wasiirka 1aad ee Wales **Mr Vaughan Gething** oo dhawaan loo doortay hogaaminta Wadankaasi oo katirsan Dalweynaha Boqortooyada UK.

Waxaanay Gudoomiyaha Iyo Hogaamiyaha Walles Ka wada Hadleen xidhiidhka Wales Uk iyo Jamhuuriyadda Somaliland Iyo Meelaha la iska kaashan karo, sidoo Kale wuxuu gudoomiyuhu Ugu Hambalyeeyey xilkaas dhawaan loo doortay .



kulanka waxaa kasoo shaqeeyey qabsoomidiisa Xildhiban Siciid Ibraahim Iyo Gudoomiyaha Jaaliyada Somaliland Ee Wales Mr Siciid Ibraahim.

### ➢ Safar Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad ku tagay Dalka Holland.

**16 ilaa 24 Bishii May 2024,** Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha **Md. Siciid Mire Faarax (Giire)** ayaa safar shaqo ku tagay dalalka Holland iyo Jarmalka ee qaarada Yurub gaar ahaan Caasimadiisa Amisterdam, waxaana Gudoomiyaha halkaan si meeqaam sare ah ugu soo dhoweeyay Jaaliyada kala duwan ee reer Somaliland ee Qaarada Yurub ku dhaqan gaar ahaan dalka Holland, wuxuuna jaaliyada kala qaybgalay Xuska Maalinta dib ula soo noqoshada Madax-bannaanida Somaliland ee 18 May.

Waxa Gudoomiye ku-xigeenka 1aad safarkaas ku wehelinayay Xildhiaanad Marwo Aamina

Cilmi Fariid, intii ay safarka ku joogeen Qaarada Yusub waxay booqdeen Xarunta Baarlamaanka Gobolka Bremen ee wadanka Jarmalka, waxaana halkaas ku soo dhweeyay Xildhibaano ka tirsan Baarlamaankaas Gobolka Bremen.



*Gudoomiye ku-xigeenka 1aad iyo Xildhibaan Aamina C. Fariid ee Dalalka Holland iyo Jarmalka*

Gudoomiyaha ayaa madaxdii uu la kulmay ee Baarlamaanka kala hadlay in xidhiidhka ka dhaxeeya Labada Wadan kor loo Sii qaado isla markaana Xildhibaanada Baarlamaan Goboleedka Bremen ay hormuud ka ka noqdaan aqoonsiga Somaliland isla markaana Xoogga ku saaran Dawlada Jarmalka inay Qadiyada Madax-banaanida Somaliland ahmiyad gaara siiso madaama dawlada Somaliland horumar Balaadhan ku talaabsatay.

- Wafti Baarlamaanka Somaliladn oo ka qaybgalay Caleemo saarka Madaxweynaha Dalka Taiwan.

**20 Bishii May 2024,** wafti balaadhan oo isugu jiray labada Aqal Baarlamaaan ee Somaliland iyo Xukuumada ayaa ka qayb-galay caleemo saarka Madaxweynaha cusub ee Dalka Taiwan, waftigan oo uu hogaaminayay Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Guurtida **Md. Siciid Jaamac Cali** kuna weheliyeen Gudoomiyaha Gudiga Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Golaha Wakiillada **Md. Maxamed Xasan Siciid iyo Md. Cumar Jaamac Faarax** oo Golaha Wakiillada ka tirsan, waxa kale oo dhinaca Xukuumada ka socday Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Arrimaha DIbada Marwo Rooda Jaamac Cilmi iyo Safiirka Somaliland ee Dalka Taiwan.



*Wafti Somaliland ee ka qayb-galay Caleemo Saarka Madaxweynaha Cusub ee Taiwan* Mr. Lai Ching-te,

Waftigan Somaliland ayay dalka Taiwan loogu soo dhoweeyay maamuus heerkeedu sareeyo, waxayna ugu horeyn ka **20 May** ka qayb-galeen Caleemo saarka Madaxweynaha cusub ee dalkaaas **Mr. Lai Ching-te,** waxayna waftiga somaliland ka mid ahaayeen wufuud ka kala socday 29 wadan oo caleemo saarkaas lagu casuumay. Intii Caleemo saarku socday waftiga Somaliland waxay kulamo kala duwan la yeesheen wufuudadaha kale ee ka soo qayb-galay caleemo saarkaa. Iyagoo Waftiga Somaliland **22 May** ay kulan gaar ah la yeesheen Madaxweynaha Cusub ee dalkaas Taiwan **Mr. Lai Ching-te,**

- **Waftigii Dalka Djabuuti ee uu hogaaminayay Gudoomiye ku-xigeen $2^{aad}$**

**02 December 2024** Waftiga Uu Hogaaminayo Gudoomiye Xigeenka 2aad Ee Golaha Wakiilada Jamhuuriyadda Somaliland Mudane **Cali Xaamud Jibriil,** Kuna Weheliyaan Xildhibaan Cumar Jaamac Faarax, Cismaan Afgaab iyo Cabdilaaahi Daahir Cukuse, Ayaa Shir-gudoonka Barlamaanka Jamhuuriyadda Djibouti oo uu Hogaaminayo Gudoomiyaha Aqalka Barlamaanka Dileyta Maxamed Dileyta Gudoomiye ku xigeenka 1aad ee Baarlamaanka Marwo Safiya, ayaa si heer sare ah ugu soo Dhaweeyay dalka Djibouti.

Dhanka kale waxay labada dhinac kawada hadleen Xidhiidhka qotoda dheer ee ka dhaexeeya labada dal, ugu danbeyn kulanka ayaa kusoo dhamaadey Isfahan iyo Xoojinta Xidhiidhka labada Waddan.

Dhanka kale waxay labada dhinac kawada hadleen Xidhiidhka qotoda dheer ee ka dhaexeeya labada dal, ugu danbeyn kulanka ayaa kusoo dhamaadey Isfahan iyo Xoojinta Xidhiidhka labada Wadda

Sidoo kale, Waftiga Uu Hogaaminayo Gudoomiye ku-xigeenka $2^{aad}$ Ee Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland Mudane Cali Xaamud Jibriil, Kuna Weheliyaan Xildhibaan Cumar Jaamac Faarax, Cismaan Afgaab iyo Cabdilaaahi Daahir Cukuse, Ayaa la kulmey Madaxweynaha Jamhuuriyadda Djibouti Mudane Ismaaciil Cumer Geele.



*Gudoomiye ku-xigeenka 2aad iyo Xidhibaano la kulmahy Madaxweynaha Djabutu Mr. Ismacil C. Geele*

Madaxweynaha Ayaa Wafiga ku qaabiley Qasriga Madaxtooyada Dalka Djibouti, kulanka Ayaa lagu gorfeeyey xoojinta iyo Xidhiidhka Qotada Dheer ee ka dhexeeya labada Dal.

Ugu danbeyn Gudoomiye Cali Xaamud Ayaa Madaxweynaha uga mahadnaqey soodhaweynta uu u sameeyey waftiga uu hogaaminaayo, kulanka Ayaa kusoo dhamaadey isfahan iyo wadajirka labada Del.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**

# LIISKA TIXRAACYADA.

## B) Ajandayaasha Kal-fadhiyadii Golaha

### AJANDAHA KAL-FADHIGA 7^AAD EE GOLAHA WAKIILLADA.

**Date: - 17/12/2024**

**1.** Warbixinta Guddiyada Golaha Wakiillada.
**2.** U yeedhista iyo la Xisaabtanka Masuuliyiinta Qaranka.
**3.** U yeedhista Masuuliyiinta Hay'adaha Amaanka Qaranka.
**4.** Xeerarka Golaha Guurtida ka soo noqday.
**5.** Dabagalka Xeerarka Dhaqangaley.
**6.** Mashaariicaha Sharci ee Golaha horyaala;

| No. | Magaca Xeerka | Marxalada uu marayo | Cidda Gacanta ku haysa |
|---|---|---|---|
| B. | Xeerka ciidanka Dab-damiska | Codayn | Codayn |
| T. | Xisaab-xidhka 2023 | Akhriska 1aad | |
| J. | Miisaaniyada Qaranka 2024 | W/maaliyada | W/maaliyada |
| X. | Wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Maamulka Maaliyaddda Dawladda Xeer Lr. 75/2021. | Akhriska 1aad | Guddi Gaar ah. |
| Kh. | Xeerka Ciidanka Qaranka | Akhriska 2aad | Guddida Arrimaha Gudaha |
| D. | Mashruuc sharciga Aas-aaska Wakaalada Madbacada Qaranka. | Akhriska 1aad | Guddida dhaqaalaha |
| R. | Mashruuca sharciga Aas-aaska Hay'adda Haamaha shidaalka. | Akhriska 1aad | Guddida Dhaqaalaha |
| S. | Xeerka Amniga Tiknoolajiyadda iyo Dambiyadda Tiknoolajiyada Casriga (Cybersecurity & Cybercrime Act). | Akhriska 1aad | Guddida Hawlaha Guud |
| SH. | Xeerka Illaalinta Xogta Electroonigga ah (Data Protaction Act). | Akhriska 1aad | Guddi Hawlaha Guud. |
| Dh. | Xeerka Hawl-galka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada. | Akhriska 1aad | Guddida arrimaha Bulshada |
| C. | Wax-ka bedelka iyo kaabista Xeerka Wadomariskata Gaadiidka. | Akhriska 1aad | Guddida Hawlaha Guud |
| G. | Mashruuc Sharciga Xeerka Dakhliga Shidaalka | Akhriska 1aad | Gudidda khayraadka |
| F. | Mashruuc-sharciga Jidaynta Kabka Horumarinta Gobollada Bari, iyo Nidaaminta Cashuurta Dawladda Dhexe U Qabato Dawladaha Hoose. | Akhriska 1aad | Gudidda dhaqaalaha |
| Q. | Xeerka Xafiiska Imtixaanaadka | Akhriska 1aad | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| K. | Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada | Akhriska 1aad | Gudidda Arrimaha Gudaha |

**7.** Ansaxinta Masuuliyinta Qaranka.
**8.** Iyo Wixii kale ee soo kordha
**9.** Xeerarka (Madaxweynaha ka soo noqda)

# AJANDAHA KAL-FADHIGA 8AAD EE GOLAHA WAKIILLADA.

**Date: - 05/05/2024**

**1.** Warbixinta Guddiyada Golaha Wakiillada.
**2.** U yeedhista iyo la Xisaabtanka Masuuliyiinta Qaranka
**3.** Xeerarka Golaha Guurtida ka soo noqday.

| No | Magaca Xeerka | Marxalada uu marayo | Cidda Gacanta ku haysa |
|---|---|---|---|
| B. | Miisaaniyada Qaranka ee 2024 | Madaxweynaha Kasoo noqday | Shir-gudoonka |
| T. | Xeerka Ciidanka Qaranka | Madaxweynaha Kasoo noqday | Shir-gudoonka |
| J. | Xeerka Dakhliga Guud iyo Cashuuraha Xeer lr.72/2022 | Madaxweynaha Kasoo noqday | Shir-gudoonka |
| X. | Xeerka Ciidanka Dab-damiska | Codayn | Codayn |
| Kh. | Xeerka Dakhliga Shidaalka | Gole Waynaha | Gole Waynaha |
| D. | Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada | Akhriska 1aad | Guddida Arrimaha Bulshada |
| R. | Xisaab-xidhka 2022 | Akhriska 1aad | Guddida Daba-galka |
| S. | Wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Maamulka Maaliyaddda Dawladda Xeer Lr. 75/2021 | Akhriska 1aad | Guddi Gaar ah. |
| Sh. | Xeerka Amniga Tiknoolajiyadda iyo Dambiyadda Tiknoolajiyada Casriga (Cybersecurity & Cybercrime Act). | Akhriska 1aad | Guddida Hawlaha Guud |
| Dh. | Wax-ka bedelka iyo kaabista Xeerka Wadomariskata Gaadiidka. | Akhriska 1aad | Guddida Hawlaha Guud |
| C. | Mashruuc-sharciga Jidaynta Kabka Horumarinta Gobollada Bari, iyo Nidaaminta Cashuurta Dawladda Dhexe U Qabato Dawladaha Hoose. | Akhriska 1aad | Gudidda Dhaqaalaha |
| G. | Xeerka Xafiiska Imtixaanaadka Qaranka | Akhriska 1aad | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| F. | Xeerka Rahamka hantida ma guurtdada ah. | Akhriska 1aad | Gudidda Dhaqaalaha |
| Q. | Xeerka Socdaalka | Akhriska 1aad | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| K. | Xeerka Hay'adda aafooyinka | Akhriska 1aad | Gudidda khayraadka. |

**4.** Mashaariicaha Sharci ee Golaha horyaala;
**5.** Ansaxinta Masuuliyinta Qaranka.
**6.** Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka.
**7.** Iyo Wixii kale ee soo kordha

## AJENDAHA KAL-FADHIGA 9AAD EE GOLAHA WAKIILLADA

**Date: - 19/08/2024**

**1.** Warbixinaha Guddiyada Golaha Wakiillada.
**2.** U yeedhista iyo la Xisaabtanka Masuuliyiinta Qaranka.
**3**. Xeerarka Ka soo noqoda Golayaasha (Golaha Guurtida iyo Golaha Xukumada)
**4.** Mashaariicaha Sharci ee Golaha horyaala.

| No. | Magaca Xeerka | Marxalada uu marayo | Cidda Gacanta ku haysa |
|---|---|---|---|
| **1.** | Xeerka Dakhliga Guud iyo Cashuuraha Xeer. Lr. 72/2022 | Madaxweynaha ka soo noqday | Gole waynaha (Codayn) |
| **2.** | Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada | Madaxweynaha ka soo noqday | Gole waynaha (Codayn) |
| **3.** | Xeerka Garyaqaanka Guud | Guuritida ka soo noqoday | Gole waynaha (Codayn) |
| **4.** | Xeerka Dakhliga Shidaalka | Gole Waynaha | Gole Waynaha (Dood) |
| **5.** | Xeerka Xafiiska Imtixaanaadka Qaranka | Gole Waynaha | Gole Waynaha (Dood) |
| **6.** | Xisaab-Xidhka 2022 | Akhriska 1aad | Gudidda Dabagalka |
| **7.** | Xeerka Rahanka Hantida ma Guurtada ah | Akhriska 1aad | Gudidda Dhaqaalaha |
| **8.** | Wax-kabedelka Xeerka Maamulka Maaliyada Dawladda - **Xeer.Lr. 75/2021.** | Akhriska 2aad | Guddi Gaar ah |
| **9.** | Wax- ka bedelka Xeerka Hay'adda Aafooyinka | Akhriska 2aad | Gudidda khayraadka |
| **10.** | Xeerka Amniga Tiknoolajiyadda iyo Dembiyadda Tiknoolajiyada casriga (Cybersecurity &Cybercrime Act) | Akhriska 1aad | Gudidda Hawlaha Guud |
| **11.** | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Wadamarista Gaadiidka | Akhriska 1aad | Gudidda Hawlaha Guud |
| **12.** | Mashruuc-sharciga Jidaynta Kabka Horumarinta Gobollada Bari, iyo Nidaaminta Cashuurta Dawladda Dhexe U Qabato Dawladaha Hoose | Akhriska 1aad | Gudidda Dhaqaalaha |
| **13.** | Xeerka Socdaalka | Akhriska 1aad | Gudidda Arrimaha Gudaha |

5. Xaalada Guud ee Dalka
6. Ansaxinta Masuuliyiinta Qaranka
7. Iyo Wixii kale ee soo kordha

# AJANDAHA KAL-FADHIGA 10^AAD^ EE GOLAHA WAKIILLADA

**Date: - 24/11/2024**

1. Warbixinaha Guddiyada Golaha Wakiillada.
2. Ansixinta Masuuliyinta Qaranka
3. Xeerarka Ka soo noqoda Golayaasha (Golaha Guurtida iyo Golaha Xukumada)
4. Mashaariicaha Sharci ee Golaha horyaala.

| No. | Magaca Xeerka | Marxalada uu marayo | Cidda Gacanta ku haysa |
|---|---|---|---|
| B | Xeerka Dakhliga Guud iyo Cashuuraha Xeer. Lr. 72/2022 | Madaxweynaha ka soo noqday | Gole waynaha (Codayn) |
| T | Xeerka Garyaqaanka Guud | Guuritida ka soo noqoday | Gole waynaha (Codayn) |
| J | Xeerka Dakhliga Shidaalka | Gole Waynaha | Gole Waynaha (Dood) |
| X | Xeerka Xafiiska Imtixaanaadka Qaranka | Gole Waynaha | Gole Waynaha (Dood) |
| Kh | Xisaab-Xidhka 2022 | Akhriska 1aad | Gudidda Dabagalka |
| D | Xisaab-Xidhka 2023 | Akhriska 1aad | Shir-guddoonka |
| R | Xeerka Rahanka Hantida ma Guurtada ah | Akhriska 1aad | Gudidda Dhaqaalaha |
| S | Miisaaniyada Qaranka 2025 | Maaliyadda | Maaliyadda |
| Sh | Wax-kabedelka Xeerka Maamulka Maaliyada Dawladda -Xeer.Lr. 75/2021. | Akhriska 2aad | Guddi Gaar ah |
| Dh | Wax- ka bedelka Xeerka Hay'adda Aafooyinka | Akhriska 2aad | Gudidda khayraadka |
| C | Xeerka Amniga Tiknoolajiyadda iyo Dembiyadda Tiknoolajiyada casriga (Cybersecurity &Cybercrime Act) | Akhriska 1aad | Gudidda Hawlaha Guud |
| G | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Wadamarista Gaadiidka | Akhriska 1aad | Gudidda Hawlaha Guud |
| F | Mashruuc-sharciga Jidaynta Kabka Horumarinta Gobollada Bari, iyo Nidaaminta Cashuurta Dawladda Dhexe U Qabato Dawladaha Hoose | Akhriska 1aad | Gudidda Dhaqaalaha |
| Q | Xeerka Socdaalka | Akhriska 1aad | Gudidda Arrimaha Gudaha |

5. Xaalada Guud ee Dalka
6. Iyo Wixii kale ee soo kordha .

## T. Liiska Mudanayaasha Golaha Wakiillada

| No. | Magaca | |
|---|---|---|
| 1 | Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon) | Gudoomiye |
| 2 | Siciid Mire Faarax (Giire) | Gudoomiye ku-xigeenka 1aad |
| 3 | Cali Xaamuud Jibriil Faarax | Gudoomiye ku-xigeenka 2aad |
| 4 | Aadan Cismaan Xarbi Cawaale | Xubin |
| 5 | Abiibakar Siciid Cali Gaboobe | Xubin |
| 6 | Abokor Faarax Warsame Caga-Yare) | Xubin |
| 7 | Amiin Saleebaan Jaamac Rooble | Xubin |
| 8 | Axmed Cabdi Ducaale (Walhad) | Xubin |
| 9 | Axmed Cabdi Muuse Cige (Inni) | Xubin |
| 10 | Axmed Dayib Aadan Guuleed ( Kucadeeye) | Xubin |
| 11 | Axmed Jaamac Saalax Maxamed | Xubin |
| 12 | Axmed Maxamed Hurre Ducaale (Barkhad) | Xubin |
| 13 | Axmed Maxamed Maxamuud Xasan (Kaare) | Xubin |
| 14 | Axmed Maxamuud Cabdillaahi Jaamac (Fanax) | Xubin |
| 15 | Axmed Muuse Jaamac Diiriye | Xubin |
| 16 | Axmed Xasan Cali Yuuusf (Casoowe) | Xubin |
| 17 | Axmed Yaasiin Maxamed Xasan Ducaale | Xubin |
| 18 | Axmed Yuusuf Nuur Guruuje | Xubin |
| 19 | Bakhad Jaamac Xirsi Batuun | Xubin |
| 20 | Bashiir Xuseen Xirsi Bulaale | Xubin |
| 21 | Bile Cabdi Ducaale Samatar | Xubin |
| 22 | Cabdiixakiim Hugur Cabdi Guuleed (Dhoolhaye) | Xubin |
| 23 | Cabdikariim Aadan Cali Dubad | Xubin |
| 24 | Cabdikariim Aadan Cumar Dhirane | Xubin |
| 25 | Cabdikariim Miicaad Isaaq Xuseen | Xubin |
| 26 | Cabdikariin Maxamed Muxumed Cumar | Xubin |
| 27 | Cabdillaahi Sh. Muxumed Axmed Cali (Gacmodhere) | Xubin |
| 28 | Cabdillaahi Yuusuf Axmed Abokor | Xubin |
| 29 | Cabdillahi Muuse Cabdi Cawaale | Xubin |
| 30 | Cabdinaasir Yuusuf Cisamaan (Qodax) | Xubin |

| | | |
|---|---|---|
| 31 | Cabdiqani Maxamed Aadan Cali (Qaniyo) | Xubin |
| 32 | Cabdirashiid Cabdilaahi Muuse Maxamed | Xubin |
| 33 | Cabdiraxmaan Yuusuf Maxamuud Cawaale (Badheedha) | Xubin |
| 34 | Cali Jaamac Caraale Bare (Cali Qaran ) | Xubin |
| 35 | Cali Xuseen Nuur Kooshin | Xubin |
| 36 | Cumar Jaamac Faarax Axmed | Xubin |
| 37 | Eng Axmed Cabdi Ibraahim Cige (Timo-Jilic) | Xubin |
| 38 | Eng Xirsi Cabdilaahi Xirsi Odowaa | Xubin |
| 39 | Faysal Yuusuf Jaamac Xaashi | Xubin |
| 40 | Fu’aad Axmed Diiriye Faarax | Xubin |
| 41 | Guuleed Maxamed Warsame Guuleed | Xubin |
| 42 | Ibraahim Cali Jaamac (Suudi) | Xubin |
| 43 | Ibraahim Maxamed Jaamac Boodhle | Xubin |
| 44 | Jaamaal Aadan Diiriye Ciise | Xubin |
| 45 | Jaamac Abokor Maxamed Mire (Indho Case) | Xubin |
| 46 | Jaamac Axmed Oogle (Caano Boodhe) | Xubin |
| 47 | Jamaal Cali Aadan (Jaah) | Xubin |
| 48 | Jimcaale Axmed Cilmi Yoonis | Xubin |
| 49 | Khadar Cali Xasan Maxamed | Xubin |
| 50 | Maxamed Abiib Yuusuf Jaamac | Xubin |
| 51 | Maxamed Cismaan Maxamed Samatar(Gurey) | Xubin |
| 52 | Maxamed Jaamac Ismaaciil (Koodbuur) | Xubin |
| 53 | Maxamed Jaamac Liibaan Cawaale | Xubin |
| 54 | Maxamed Khadar Daahir Mooge | Xubin |
| 55 | Maxamed Xasan Siciid Maxamuud | Xubin |
| 56 | Maxamed Xuseen Jaamac Raanboo | Xubin |
| 57 | Maxamed Xuseen Maydhane Obsiiye | Xubin |
| 58 | Maxamuud Faarax Jaamac Maxamuud | Xubin |
| 59 | Maxamuud Saalax Cabdi Axmed | Xubin |
| 60 | Maxamuud Xayir Ducaale Diiriye | Xubin |
| 61 | Mubaarig Xuseen Maxamed (Xeel-Dheere | Xubin |
| 62 | Mubaarik Muuse Ismaaciil Xuseen | Xubin |

| | | |
|---|---|---|
| **63** | Mukhtaar Ibraahim Xaashi Cilmi | Xubin |
| **64** | Mukhtaar Xasan Maydane Shirdoon | Xubin |
| **65** | Mustafe Axmed Cabdilaahi Ismaaciil(Khayreeye) | Xubin |
| **66** | Aaamina Cilmi Fariid | Xubin |
| **67** | Nuuradiin Axmed Dayib Cabdiraxmaan | Xubin |
| **68** | Qaasim Aadan Saleebaan Cali | Xubin |
| **69** | Saalax Maxamed Diiriye Xujaale | Xubin |
| **70** | Saleebaan Axmed Carab Jaamac | Xubin |
| **71** | Saleebaan Diiriye Bare Cali | Xubin |
| **72** | Saleebaan Maxamed Faarax Geedi (Goox) | Xubin |
| **73** | Saleebaan Nuur Warsame Faarax (Food) | Xubin |
| **74** | Siciid Jaamac Xasan Maxamed | Xubin |
| **75** | Siciid Maxamed Ismaaciil Diiriye (Sokeeye) | Xubin |
| **76** | Xasan Axmed Cilmi Geelle (Xasan Kayse) | Xubin |
| **77** | Xasan Cumar Xasan Rooble (X.Ogaal) | Xubin |
| **78** | Xasan Saleebaan Dhuxul (Laabsaalax) | Xubin |
| **79** | Xuseen Aadan Cabdi Axmed | Xubin |
| **80** | Xuseen Ismaaciil Jaamac Xirsi (Budul) | Xubin |
| **81** | Yaxye Cabdillaahi Aamiin Ismaaciil (Araarse) | Xubin |
| **82** | Yuusuf Faarax Warsame | Xubin |

## J. LIISKA QAAR KA MID AH SHAQAALAHA GOLAHA WAKIILADA

| A. | Xog-hayaha Guud iyo ku-xigeenka | |
|---|---|---|
| No. | Magaca | Xilka |
| 1 | Abdirisak Sa'ed Ayanle | Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada |
| 2 | Jamal Jama Hassan | Xog ku-xigeenka Golaha Wakiillada |
| B. | Agaasime Waaxeedyada | |
| No. | Magaca | Xilka |
| 1 | Awad Ali Mohamed | Ag/Waaxda H/qoraalka, Shuruucda & Daabacadaha |
| 2 | Abdinasir Osman Mahamoud | Agaasimaha Waaxda Qorsheynta iyo Tababarada |
| 3. | Abdilahi Abdi Adan | Ag/Waaxda Warbaahinta Tig iyo Xidh. D/waynaha |
| 4 | Farax Ibraahim Gamuute | Agaasimaha Waaxda Maamulka iyo Xisaabaadka |
| 5 | Hamse Mohamoud X. Muuse | Agaasimaha Waaxda Miisaaniyada G.Wakiilada |
| 6 | Ismahan Yusuf Ibrahim | Ag/Waaxda Xog & Guddiyada & Gobolada |
| 7 | Nuur Diiriye Cabdillahi | Ag/Waaxda Hab-maamuuska iyo Amiga |
| 8. | Mohamud Mohamed Osman | Ag/Waaxda Cilmi Baadhista iyo Shurucda |
| 9 | Sa'ed Yasin Ismail | Agaasimaha Waaxda Shaqaalaha |
| 10 | Sulieman Abdisitar Dubad | Ag/Waaxda Xusuus Dhowrka iyo Laybareeriga |
| 11 | Maxamed Siciid Xuseen | Xisaabiyaha Golaha Wakiilada JSL G/W |
| C. | Agaasime ku xigeenada | |
| No. | Magaca | Xilka |
| 1 | Abdinasir Kayse Maxamuud | Ag/ku xigeenka Waaxda Cilmi Baadhisata |
| 2 | Abdiasiis Ibraahim Jaamac | Ag/ ku xigeenka warbaahinta, Xidh. D/waynaha |
| 4 | Ridwan Abdillahi Abdi | Ag/ ku xigeenka Waaxda Guddiyada iyo Gobolada |
| 5 | Sahal Guuleed Xadi | Ag. Ku-Xigeenka W. H/oraalka iyo Daabacadaha |
| 6 | Xuseen Cabdi Jaamac | Ag/ku xigeen Waaxda hab-maamuuska iyo Amniga |
| 7 | Yuusuf Xabiib Xuseen | Ag/Ku-Xigeenka Xusuus Dhowrka iyo Laybareriga |
| D | Xoghaymaha Guddiyadda | |
| No. | Magaca | Xilka |
| 2 | Khadra Suber Nux | Xoghayaha 2aad ee Guddida Dabagalka |
| 3 | Abdirahman Ahmed Abdilahi | Xoghayaha 1aad ee Guddida Dhaqaalaha |
| 6 | Maxamed Jaamac Cabdi | Xoghayaha 2aad ee Guddida Arrimaha Guddida |
| 7 | Cabdirisaaq Maxamuud Siciid | Xoghayaha 1aad ee Guddida Arrimaha Dibedda |
| 8 | Fadxa C/laahi Jaamac | Xoghayaha 2aad ee Guddida Arrimaha Dibedda |
| 9 | Ayanle Ahmed Abdi | Xoghayaha 1aad ee Guddida Joogtada ah |

| | | |
|---|---|---|
| 10 | Shukri Ahmed Abdillahi | Xoghayaha 2aad ee Guddida Joogtada ah |
| 11 | Ali Mohamed Hussein | Xoghayaha 1aad ee Guddida Hawlaha Guud |
| 12 | Maxamed Xuseen Cilmi | Xoghayaha 2aad ee Guddida Hawlaha Guud |
| 13 | Cabdiladiif Axmed Maxamed | Xoghayaha 1aad ee Guddida shareecada |
| 14 | Ibraahim Maxamed Faarax | Xoghayaha 2aad ee Guddida shareecada |
| 16 | Cabdale Ciise Xasan | Xoghayaha 2aad ee Guddida Deegaaka |
| 17 | Caydiid Xiis Caydiid | Xoghayaha 1aad ee Guddida Arr. Bulshada |
| 18 | Cabdiwahab Maxamed Yuusuf | Xoghayaha 2aad ee Guddida Arrimaha |
| 19 | A/Rahman Jama Nur | Xoghayaha 1aad ee Guddida Caddaalada |
| 20 | Maxamed Axmed Cabdi | Xoghayaha 2aad ee Guddida Caddaalada |
| E. | La-taliyaasha shaqaalaha ku jira | |
| **No.** | **Magaca** | **Xilka** |
| 1 | Cabdiraxmaan Hirad Jaamac | La-taliye Sharci |
| 2 | A/risaq Muse Idle | La-taliye Arrimaha Bulshada |
| 3 | Fu'aad Jaamac Axmed | La-taliye Gudida Arrimaha Bulshada |
| 4 | Jaamac Cabdi Muxumed | La -taliye Sharcig ee Arrimaha Shareecada. |
| 5 | Mubarik Farah Warsame | La-talyaha Siysaasda (Policy Advisor) |
| 6 | Mustafe Mohamoud Hassan | La-Taliyaha Khayraadka dabiciga ah |
| 7 | Sa'ed Farah Hashi | La-taliyaha Mashaariicda |
| F | La-taliyaasha aan shaqaalaha ku jirin | |
| **No.** | **Magaca** | **Xilka** |
| 1 | Yuusuf Cismaan Cabdulle | La -taliyaha Afka iyo dhaqaanka G. W |
| 2 | Maxamed Cismaan Badal | La -taliyaha Afka iyo dhaqaanka G. W |
| 3 | Axmed Yuusuf Xuseen | La-taliyaha Gudidda Garsoorka, Cadaaladda |
| 4 | Xasan Maxamed Jaamac (X.xiis) | La- taliyaha Xidhiidhka Caalamiga ah |
| 5 | Cabdirisaaq Jamac Cilmi | La-taliyaha |
| 6 | Axmed Maxamed Xaashi | La-taliyaha Dhaqanka |
| 7 | Cismaan Axmed Maxmed | La-taliyaha maamulka iyo Xisaabaadka |
| 8 | Maxamed Cabdiraxmaan Ducale | La-taliyaha Luuqada Carabiga |
| 9 | Cabdillahi Cabdi Cawad | La-taliyaha Guddida Dhaqaalaah |
| 10 | Cabdirisaaq Maxamed Siciid | La- taliye Sharci |
| 11 | Mubarik Cabdi Ismaaciil | La-taliye Sharci |
| 12 | Khadar Maxamed Axmed xayd | La-taliye Sharci |
| 13 | Rooda Yaasiin Cabdillaahi | La -taliye Gudidda Arrimaha Sharcig |

| | | |
|---|---|---|
| 14 | Aadan Salaad Seed | La-taliye Sharci |
| 15 | Ibraahim Sh. Aadan Xuseen | La-taliyaha Xidhiidhka Dalalka Carabta |
| 16 | Olol Yaasiin Axmed | La-taliye Arrimaha Xidhiidhka Dibada |
| 17 | Maxamed Xuseen Faarax | La-taliye |
| 18 | Bile Jaamac Aadan | La-taliyaha Gud.ku-xigeenka 1aad |